# WEHEL Jacayl



Cabdisamad Sumcadda

Baahinta
Hiil Press
DAL IYO DIBAD
Hiil Press, waa shirkad daabacaad, faafin iyo baahin. Hiil Press, wax ay u heellantahay hodminta maktabadda Soomaaliyeed iyo in ay abuurto kacdoon aqooneed oo horseeda horumar iyo horusocod bulsheed.
© Cabdisamad Aw Daahir "Sumcadda" 2022
Xuquuqda buuggan idilkeed waxaa leh qoraaga ku magacaaban. Dib loo ma daabacan karo, si kalena loogu ma tagrifali karo, iyada oo aan qoraaga laga helin oggolaansho qoran.

Madbcadda Hiil Press
Qaahira , Hargeysa
contact@hiilpress.com
Daabacaadda 1aad (2022)
Wehel Jacayl
Tifaftirka: Cabdiraxmaan Yuusuf
Quraaridda buugga: Cabdilladiif Geelle
Nashqadda jaldiga: Mustafe Mahad
ISBN: 978-1-63944-119-8

# MAHADNAQ

Marka hore, waxaa mahad leh Rabbiga Weyn ee koonkan uumay, anigana ifka igu kor yeelay, iguna karaameeyay diinta Islaamka, iina kaamil yeelay lixda laxaadba, iguna ilhaamiyay inaan qoro oo aan allifo buuggan "Wehel Jacayl".

Mar labaad, waxaa mahad leh waalidkay iyo dhammaan dadka igu taageeray, qayb libaaxna ka qaatay sidaan u noqon lahaa qof waxsoosaar leh. Dadkii wax ka geystay buuggan, dhammaantood, kuwaas oo talo iyo tusaalaba u siiyay, si maamuus iyo qaddarin leh baan ugu mahadnaqayaa.

Dadkaa waxaa ka mid ah **Mawliid Maxamed Xaashi** iyo **Cabdiraxmaan Yuusuf Axmed** oo aan ku sharfayo doorkii ay ka qaateen tifaftirka iyo toosinta higgaadda buugga. Sida oo kale waxaa aan doorkiisii naqshadaynta jeldiga buugga ku maamuusayaa **Bashiir Abikar Abdullahi** oo ka tirsan bahda shirkada TIME MEDIA.

Mudanka kale ee aan abaal-celinta u hayo waxa ka mid ah:

1. Maxamed Xiis Axmed
2. Maxamed yuusaf Ammare
3. Maxamed Cabdi Wabax
4. Amal Gillin
5. Shugri Cawl
6. Mustafe Mahad.

Intaa waxaa ii dheer, in aan si gaar ah ugu mahadnaqayo ganacsade Axmed Cismaan Geelle oo igu garab istaagay hankayga qoraannimo, sidoo kalena qayb libaax ka qaatay sidii aan u noqon lahaa qof waxsoosaar leh. Waxa uu ganacsaduhu ku suntan yahay taageerida dhallinyarada curinta leh, si ay dalka iyo dadkaba ugu noqdaan tusaale ku dayasho mudan. Sidaas darteed, waxa aan ku sharfayaa oo aan ku maamuusayaa doorkiisa muuqda ee hagar la'aaneed ee uu mar kastaba ugu heellan yahay horumarka bulshadiisa reer Somaliland. Waxa aan Eebbe uga baryayaa in uu if iyo aakhiroba ku karaameeyo, cisi iyo sharafna korkiisa yeelo.

# HIBEYN

Buuggan oo jacaylka, nooc kasta oo uu yahay, si qoto dheer ugu nuuxnuuxsanaya, inta wax naawilaysa iyo inta nabdiga ku haysaaba ay si laab furan ugu naaloon haraan, waxaan u hibeeyey dadkii jacaylka dhibta u soo maray iyo kuwa imika ugu jiraba. Waxaana dadkaas ugu horreeya Cilmi Ismaaciil Liibaan (Cilmi-Boodhari) oo jirabkii iyo jahawareerkii uu jacaylka kala kulmay godka la jiitaday. In kastoo ay badan yihiin dadka jacaylka dhulka ula dhacay ee uu dhaawaca u geystay, haddana waxaa jira, marka Cilmi laga yimaaddo, dad madhaafaan ah oo aan la hilmaami karin, waxaana ka mid ah: Cali-Maax iyo Cawrala' oo labadooduba jacaylka u dhintay. Qays iyo Leyla oo iyagana jacaylku aakhiro ula dhaadhacay. Alle ha u naxariisto dhammaantoodba.

Waxaa kale oo aan u hibeeyey buuggan Abwaannada iyo Maansoyahannada, oo waagii berya iyo qorraxdii dhacdaba dadka u sharaxayey jacaylka, kana tiraabayey marka dhacdo cusub oo jacayl ahi timaaddo. Hawraarta iyo heesaha ay tiriyeenna dadka inta la tabaaleysan ee uu jacaylku la taraaray, iyo kuwa ku tanaadayba, ay isku maaweelin jireen.

# TUSMADA BUUGGA


| | |
|---|---|
| Mahadnaq | 5 |
| Hibeyn | 7 |
| Tusmada buugga | 9 |
| Lammafilaan | 11 |
| Burburka Jacaylka iyo Saamaynta Dabeecadda | 29 |
| Geeddiga jacaylka iyo gedgeddoonka waayaha | 35 |
| Yaa u kala warrama? | 61 |
| War la'aanta indhoolka iyo walbahaarka jacaylka | 91 |

# LAMMAFILAAN

Wiil iyo gabadh wax wada barta, duruustana meel ka wada daalacda, ayaa isla bilaabay jacayl biyo-kama-dhibcaan ah. Waxa uu degay beerka, wadnaha iyo meel kasta oo loo nisbeeyo in uu jacaylku masallaha dhigto. Inta uu ku dhex bulaalay ayaa uu ku laba qarxay. Dareen kalgacal xambaarsan ayaa ay isugu baaqayeen hadh iyo habeen. Fariimaha cishqiga sida ayaa u ahaa soor ay quutaan.

Berigaas aaladaha casriga ah ee lagu wada xidhiidhaa ma jirin, sidaa darteen layn guriga ugu rakibnaa ayaa codka u kala lalin jiray. Dhawaaqa tilifoonka ayaa mar kasta aqalka ka dhex yeedhi jiray; haasaawahooda aan kala joogsiga lahayd ayaa hakad geliyay dadkii guriga kula noolaa; jaaniska ay markooda dhegta qabsan lahaayeen ayaa ay laf dhuun gashay ku noqdeen.

Tilifoon kasta oo soo dhacaa waxa uu wadaa dalabaad jacayl: "Axmed ma joogaa", iyo "Deeqi ma joogtaa?" ayaa maqalkii dadka ku batay. Warkoodii ayaa ku fiday labadii reer ee ay ka soo kala jeedeen.

Markii uu jacaylkoodii soo shaacbaxay, xamxamtiina badatay, qofkii ugu horreeyay ee giraanta socota soo dhex galaa waxa uu noqday Axmed aabbihii. Talo waayeelnimo ayaa uu u soo jeediyay inankiisii. Haasaawaha in uu soo gabagabeeyo guurna u diyaargaroobo, ayaa uu ku guubaaabiyey. Isaguna hadal kama soo celin ee 'hawraar san' baa uu yidhi.

Gacalisadiisii ayaa uu markiiba wacay, waxa uu ku wargeliyey in uu u soo geedfadhiisanayo. Markii ay intaa maqashay ayey farxad iskala garan wayday. Midho ay in badan sugaysay ayaa wakhtigii ay soo go'i lahaayeen jooga.

Warkii muusoodka iyo bushaarada xambaarsanaa ayey ku taabatay aabbaheed, balse sidii ay filaysay wax uma dhicin. Halkii uu ka soo dhawayn lahaa, wajigabax ayey kala kulantay. Arrinkii ay wadday indho fayow laguma fiirin ee didmo ayaa uu odaygu ka muujiyey. Waxa uu ku xujeeyay in ay waxbarshada dhammayso ilaa heer jaamaceed. Shan sanno oo dambe ayey ku qaadanaysaa in ay soo gabagabaysaa, sidaas darteed uma cuntamin go'aankaasi.

Axmed oo war ka sugayey ayey la hadashay, in ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen, arrintoodiina Bariga Dhexe marayso, ayey u sheegtay.Waa wax aanu filayn oo fajaciso ku ridaye, waxa uu talo ula noqday aabbihii. Markii ay rogrogeen xaajada, in odayga lala xididayo toos loo waco ayaa la isla gartay. Judhii loo soo bandhigay in inantiisa loo soo geedfadhiisanayoba qaylo ayaa uu afka

furtay, markaas baa uu erayadan kala hor yimi: "Ma inanta yar ee waxbaraynaysa ayaad rabtaan in aad mustaqbalkeeda seejisaan? Ma dhacayso, arrintaana diyaar uma ihi ee sidaa ku abshira".

Axmed, warkii la is yidhi loo sheeg. Dhegiba jaan leekaatay oo arrimuhu ku cakirme. Dareenkii jacaylka oo ciishoonayaa ayaa ku labakacleeyay; markaas buu joog iyo fadhiba diiday, hadalna ay kaga dhegtay: "Haddii aan inantaa la ii doonin, taloba talo iima aha".

Sheekadii waa ay sii murugtay, xaalkiisu qiiro jacayl iyo qarracan buu marayaa. Aabbihiina geed gaaban iyo mid dheerba waxa uu u koray sidii uu ugu soo xerogelin lahaa mudantii uu dumarba ka doortay. Odayga Deeqa dhalay ayaa se ku noqday darbi adag oo aan la mari karin.

Deeqa oo sida Axmed jacayl darani ku oogan yahay waxa ay u tafaxaydatay sidii ay gacaliyaheeda u dejin lahayd, iyada oo ku waaninaysa in uu samir guddoonsado. Sida ay ugu naseexaynayso ayaa uu marmar is yidhaahdaa: "Malaha dabkan kugu shidani iyada shiddaba kuma hayo!" Kolkaas bay heestan ugu laabqaboojisaa:

*"Inan yahow adduunyadu*
*Ayaan keliya maahee*
*Ibtiladan ku haysaa*
*Amba way ag taallaayoo*
*Eridhaban sidiisaan*
*Kuu olalayaayeee;*

*Ma illoobi karayoo*
*Axdigii dhexdeenna*
*Waan adkaynayaa*
*Arladaba dhammaanteed*
*La'aantaa iftiinow*
*Waa urugadaydee*
*Ha is odhannin keligaa*
*Yaa olol jacayl qaba*
*Amba kula mid baanee".*

Dareenka in ay la qabto waxa u dheeraa culays kaga imanayay xagga qoyskeeda. Tilifoonkii ayaa laga jaray; xidhiidhkii tooska ahaa ee gacaliyaheeda kala dhexeeyay ayaa weerarka lagu ekeeyay; gaadh qorsoon iyo mid muuqdaba waa la dul dhigay; balse Jacaylkii jidgooyada loo galay ma joogsan ee oodda ayuu soo jebshay. In uu ku siyaado mooyee horjoogsigii waxba kama uu dhimin. Waxa ay qaylodhaan u dirsatay asaxaabteeda si ay ugu kala dabqadaan iyada iyo gacaliyaheeda. Wararka Axmed in aanay ka kala go'in ayey u hawlgashay. Diif kastaa ha ka gaadhee, mar kasta waxa ay u heellanayd si aan dabku uga baqtiyin.

Jacaylkoodu magaalaadii buu gees kasta u dhex qaaday. Sheekadoodii waxa ay noqotay taxane ay dad badani ku xidhan yihiin. Hadba wixii ka soo cusboonaada ayaa loo dhegtaagi jiray.

Wakhtiga dheeraaday ee soo afmeermi la' ayuu Axmed u noqday dhibbane. Waa bukaansocod tallaabadii in uu gabo wax yar u jira. Iskuulkii wuu ka saahiday oo beryahaaba ma fooldhigin. Maamulka iyo ardayduba way ka warqabaan. Muddo ayey arrintiisu soo jiitamaysay ilaa uu markii dambe xakamaha goostay, waxbarshadiina ka soo ag wareegi waayey.

Xubbigii wuu ku sii xumaaday ilaa uu noqday maqane jooga. Goor iyo ayaan waxa uu ku alaledaa magaceeda, iyada ayaa hor joogta oo aan qalbigiisa ka faaruqin sikin keliya.

Reerkoodii talo ayaa ku caddaatay, si alla iyo si ay sameeyaan ayey garan la'yihiin. Dib bay isugu noqdeen si ay xal midhodhal ah uga soo saaraan xaalka aan ka soo raynta lahayn ee inankooda, iyo xabsigan adag ee jacaylku ku albaabay. Waxa loo soo jeediyay in uu jawiga beddesho oo uu baadiyaha u baxo, waa uu se ka gawsqabsaday. Ma rabo in uu Deeqa ka fogaado. Magaalo in ay wada joogaan ayaa u ah naxariis oo nabdigu ugu degayaa.

Horwayntii geela ahayd iyo haleeladii dhashay ee loogu baaqay in uu dhex tago oo caano ka soo dhamo, waxa uu ka doorbiday in uu bandarka ku negaado. Intii uu ku naaloon lahaa neecow macaan oo gacalisadiisu ka maqan tahay, waxa uu is tusay in uu is moogaysiiyo gu'gaa curtay ee daadku mulucyeeyay. Masalooyin kale ayaa iyana la isku dayey in lagaga mashquuliyo Deeqa iyo jacaylkeeda, waa se lagu hungoobay. Qalbiga Axmed ma ahayn mid si dhayal ah ku illaabaya jacaylka.

Gufaacooyinka cishqigu kicinayo ayaa gees walba isaga yeedhay. Daad aad mooddo in uu jacaylku danabeeyay ayaa labadoodaba isu maray. Sida heestan uu Cabdi-Qays curiyey sheegayso ayey jihadi ka luntay:

*"Webiga i sitee*
*I walwaalayaa*
*Xaggee igu wadaa;*
*Waydiiya oo*
*Wed waa loo dhashee*
*Wax ka daran miyuu*
*Ii werinayaa!"*

Axmed reerkoodu waxa ay maal iyo muruqba u hureen sidii ay inankooda ula tacaali lahaayeen. Aabbihii oo jacayl iyo waayihiisa aan maqal Cilmi-Boodhari dabadii, ayey ka bilaabantay gondihiisa. Gabankii uu dhalay ayaa la qaldhebaya utuntii jacaylka. Dawada keliya ee lagu badbaadin karayaa waa Deeqa oo ay derin ku wada jiifsadaan.

Hees ayaa ahayd:

*"Dedan maahe daalacan*
*Dagaal maahe waa nabad*
*Dawadiisa caashaqu*
*Waa dadkii is doortee".*

Dhowr jeer ayuu isku dayey in uu odayaal urursho si ay uga wardoonaan aabbaheed, looguna qanciyo in uu inanta bixiyo intii uu ku taloxumoobi lahaa. Mar kasta oo loo tago, hungo uun baa lagala soo noqdaa.

Xaaladdiisa oo geeri iyo nolol u dhexaysa ayaa kellifaysa in kolba guuto la diro waxba se kama soo naaso cadda. Dadaal kasta oo la huray iyo tacab kasta oo la geliyey waxa ay noqdeen hal bacaad lagu lisay. Odayga inanta dhalay ayaa laf dhuun gashay ku noqday dadaal kasta oo lagu samatobixin lahaa lammaanahan is calmaday. Kaaga sii darane, gooddi iyo hanjabaad aan kalago' lahayn ayaa uu ku hayaa inantiisa.

Odayga waxa isu weheliya dhowr waxyaabood oo qaarna uu qarsanayey kuwona uu bannaanka soo dhigay. In uu ka gungaadh aqooneed la rabo gabadhiisa waxa u dheer nacayb uu u qabo wiilka inanta ka soo doonay. Waxa uu saluugay in wiil yar oo food-dheere ah, camalna aan hayni uu inantiisa soo hawaysto. Marka se la soo hor fadhiisto waxa uu hadal ku soo gaabiyaa: "Inantaydu gedihii guur loogu xilan lahaa ma gaadhin".

Deeqi, maadaama aabbaheed arrintii jiq kaga dhigay, ma garanayso jid u furan oo aan ahayn in ay aqalka hoosta ka soo xidhato iskana oydo. Cid ay duruufta ku xeeran hoos ula wadaagto ma haysato. Carruurta iyada ayaa ugu wayn, gabdhona inan 10 jir ah ayey walaalo yihiin. Hooyadeed, oo gaashaan u noqon lahayd, waa hore ayaa la oofsaday. Waxa ay wehel ka dhigataa akhrinta

farriimo uu Axmed warqad ugu soo gudbiyey oo ubaxyo guduudan iyo wadnayaal lagu sharraxay.

Hees ay isla dhegaysan jireen ayaa had iyo goor u daaran. Xaaladda ay ku sugan tahay iyo waydiimo heestu soo hor dhigayso ayaa si isula jaanqaadaya—*"Umaleey jacayl"* iyo curintii Cabdi-Qays:

*"Umaleey jacayl,*
*Marna jaar ma noqoteen*
*Jid ma wada lugayseen*
*Ma la cuntay jidiin weli*
*Jihaad ma isku aragteen;*
*Jiiddaad ka dhalatiyo*
*Ma kaa jaray dadkii oo*
*Goonijoog ma kaa dhigay;*
*Umaleey jacayl*
*Weli jiif ma kugu helay;*
*Hurdo maysku jiidheen*
*Jirjirrada ma kaa galay*
*Hadba jiho ma kuu dhigay*
*Jiidh durugsanaa iyo*
*Qalbi meel fog kaa jira*
*Riyadii ma jaarteen!"*

Afarta jihaba dhawaaqeedu waa uu gaadhay. Ehelkeeda kale ma tahli karayaan in ay soo farigeliyaan urugada haysata maadaama aabaheed kaga gudban yahay.

Way isku buuqday oo hoos isula hadashay. Xishoodka ayaa dabraya oo, sida Axmed, dhawaaqeeda sare looma maqli jirin. Dhimbiilaha uu jacaylku firdhinayo ayaa nugleeyay oogada jidhkeeda, markaas bay midabdoorsoontay oo muuqeedii is beddelay.

Aabbaheed—in uu u garaabo iska daaye—waxa uu u arkayey gabadh la soo weeraray oo duullaan lagu yahay. Erayada catowga iyo calaacalka xambaarsan ee ka soo fulayaa ma ahayn kuwo jixinjixin ka helaya dadkii ugu dhawaa ee guriga kula noolaa, taa beddelkeeda waa laga maadsan jiray. Hablihii soo booqan jiray ee dabdemiska u ahaa ayaa laga mamnuucay. Cunaqabatayn iyo bandow hadh iyo habeen ah ayaa la saaray.

Markii warkii Deeqi ka kala go'ay, Axmed waxa uu sameeyay wax kasta oo uu is leeyahay waad ku heli kartaa. Gaadhi ayuu codbaahiye saaray, guriga gacalisadiisa oo in door ah u jiray ayuu hadba dhinac kaga yimi. Hees ay isla yaqaanneen ayuu codbaahiyuhu lalinayaa, dhegaha Deeqa ayaa loo dan leeyahay in ay toos ugu dhacdo. Waxa uu gudbinayaa farriin u dhigan 'in aanu wali quusan ee uu ku raadjoogo sidii uu hanan lahaa'.

Heestu, sidii ay u socotay, qolkii ay joogtay ayey daf soo tidhi. Erayada heesta iyo luuqda hobolkii codka tolmoonaa ee Tubeec markii ay maqashay ayey hanqalka la soo kacday.

*"Nayruusku waa ciid*
*Waa negi adduunyadu*
*Waa nuur kalgacalkuye, naruurow!*
*Waa nuur kalkacalkuye, nasteexooy!*
*Nafta ma u xiddigisaa*
*Nacab ma iska celisaa*
*Waxaad naawilaysiyo*
*Naqu ma kuu cuntamayaa?*
*Inakuna nasiibkeen,*
*Nasiibkaa, nasiibkay,*
*Ma ku naaxi doonnaa;*
*Caashaqu necawdaa*
*Ma ku neefsan doonaa!"*

Inta ay fadhigii ka soo kacday ayey daaqadda soo istaagtay: mise waaba Axmed oo gaadhiga shidhka ugu jira! Jidhiidhico ayaa ku soo istaagtay. Dareen qiiro iyo kalgacal xambaarsan ayaa saaqay. Inta ay iska ilmaysay ayey allabari u jeedsatay: "Ilaahow waad na aragtaa, naxariistaada noogu deeq", ayey ku qunuudday, ilaa intii uu ka tagayeyna daaqadda ayey sii taagnayd.

Imaanshiyihiisu dardar cusub ayuu ku abuuray, waxa ay garowsatay in uu warkeeda u oomman yahay.Qaabkii ay warbixinteeda ugu gudbin lahayd ayey u tafaxaydatay.

Bandowga la saaray iyo in cidla jaaqla ah lagu abbudhay ayey rabtaa in ay Axmed uga warranto. Si foolkafool ah in ay ula kulantaa ma hawl yara, waxa saaran xannibaad oo dibadda looma oggola, tilifoonna daa hadalkiisa; aqalkaba waa hore ayaa laga jaray.Waxa ay dantu ku kelliftay in ay warqad iyo qalin soo qaadato.

Sadarro ay bud'dhig uga dhigtay qamuunyada jacaylka iyo qulubka lagu hayo ayey qalinka ku duugtay. Dareenno isku dhafan oo yididiilo iyo yabaalba isugu jira ayey ku gantay. Waxa ay uga warrantay badwaynta ay dhex dabbaalanayaan, walaaca ay ka qabto in jacaylkoodu ka soo mudho caqabadaha haysta iyo dabaylaha ufada ku kiciyey. Sidan baanay warqada ku bilowday:

"Gacaliye, daaqadaha werwerka ee jacaylkeennu kugu furay waan ogsoonahay. Ma ihi mid aad laabteeda si dhayal ah uga faaruqayso; ilays baad ii tahay, iyo nal aan wax ku arko. Haddii aan awood u lahaan lahaa agtaada ayaan ka soo muuqan lahaa; dhaaawaca kugu yaal baan dhaymo u noqon lahaa; dhayda macaan ee xubbiga ayeynu wada dhami lahayn; ubaxyo guduudan oo carfoon baan ogadaada ku daadin lahaa.

Gacaliye, waad ogsoon tahay aqalka aan ku dhex seetaysanahay ee oodda la iigu jiiday; dagaalka igu socda ee dartaa iigu dhacaya; iyo dakanooyinka uu waayuhu i baday ee aan dhammaadka lahayn.

Wax kasta oo igu dhaca waxa aan ku illaabaa rejada aan ka qabo in ay maalin uun riyadeennu rumowdo. Waxa aan guddoonsaday Samir, iyo in aan saacadaha guusha ka warsugo".

Markii ay fariinta gabagabaysay ayey raadisay meel ay u mariso. Walaasheedii ka yarayd ayey ciidan bidday, si ay warqadda ugu gayso gabadh ay saaxiibbo yihiin oo ka mid ah kuwii laga mamnuucay, wayna la sii dartaarantay: "Walaal, sida aad alaabtaas u waddo hebla u gee, cid kalena ha tusin iyada mooyee". Warqaddii ma hakan ee markiiba Axmed baa toos loogu gudbiyey.

Dhambaalkii loo soo diray markii uu furayba waxa ku soo xoomay dareen kalgacal oo in badan gaaxsanaa, si qalbitaabad leh ayuu warqadda ugu dul gunuunucay. Jawaab uma hollan ee waxa uu huruufay naftiisa; gelgelinta habaaska miidhan ah ee uu fadhiyo ayuu hiifay; markaas buu inta uu sare u booday heegan is geliyey. Rejada haadaanta ku dhacday ayuu rabaa inuu soo nooleeyo, waa se goor uu jacaylka u nuglaaday. Curinta fikrado uu ku hanto jacaylkiisa tamar uma hayo, goor hore ayey kala hadaafeen isaga iyo caafimaadkii lagu hawlgeli lahaa. Beryahaaba awooddiisa jidheed ma fiicnayn. Dheefi kama degto, dhaqdhaqaaqna hadalkiisa daa; diif iyo darxumaba way ku idlaadeen. Markii taah mooyee wax kale laga waayey, waxa la isla qaatay in aan guriga lagu sii hayn, sidana lagu sii eegan, ee cisbitaalka loola cararo.

Markii dhakhtarka la dhigayba sayloon baa lagu rakibay si uu dheef ugu noqdo. Dhibtii iyo dhalandhoolkii iyo wixii dhafarka ku sababay markii uu ka cabbirqaatay, waxa uu diktoorku ku taliyey in uu nasiino u baahan yahay muddona halkan lagu baxnaaniyo, si dawooyinka kaalmaatiga ahi ay ugu socdaan.

Warkii dhiillada lahaa ayaa gaadhay Deeqa; xanuunkii hore ayaa mid kale ugu darsamay. Kolkaas bay halkii ay taagnayd ku kala qabowday. Gadood iyo guluf jacayl ayaa gudaheeda ka bilaabmay. Waxa ay qaadatay go'aan; gaadhkii dabka sitay ee goonyaha ka joogay ayey damacday in ay jiidho. Arrin waxa ay ku goysay in ay lugaheeda ku tagto cisbitaalka. Si dhukusaad ah ayey alasaydii hore guriga uga baxday. Jarmaadadiiba dahkhtarka ayey gaadhay. Qolkii uu jiifay oo lambarkiisa loo sheegay ayey toos u abbaartay. Cidi lama socoto, waa keligeed. Waxa ay xidhan tahay indhoshareer, in la gartaana ma howl yara, balse Axmed waa ay uga soocan tahay hablaha kale. Soo joogsigeedii iyo salaantii horeba laabta ayuu la soo kacay. Jidhiidhico ayaa tin iyo cidhib isku taagtay, dareen isu muhasho iyo hilow xambaarsan baa labadoodiiba saaqay. Muddo ayaanay is arag oo deyr u dhexeeyay, maanta se wajiyadoodu way isu muuqdaan. "Alla waa Deeqa!" markii uu yidhi ayey laba wiil oo la joogay ku baraarugeen. Fadhiga inta ay uga kaceen ayey meel agtiisa ah kursi u dhigeen, saa qolkiiba way u cidleeyeen. Labadii is jantay ee isu jeellanaa ayaa makhsinkii isugu soo hadhay. Cabbaar baa la is waraystay oo la iska dul ooyay. Waxa ay isla jafeen wakhtigii adkaa iyo jirrabkii lagu hayey.

Sheekadii dhex martay waxa ay ku jaangooyeen in ay keenaan jid lagaga baxo caqabadaha haysta. Labadii wiil ee bannaanka u baxay bay u yeedheen, markaas bay la wadaageen shaxdii ay degeen: "Aniga iyo Deeqi magaalada waannu ka baxaynaa ee gaadhi noo diyaariya", ayuu inamadii ku yidhi. Way ku raaceen iyaguna maadaama ay u arkayeen fursadda keliya ee inankoodu kaga bixi karo culayska haysta.

Tabaabushe ayaa la galay. Waa subax hore. In dhulka ceeryaamo ku fadhiyaan awgeed, dadkii ka jiidhi lahaa hoosiiska ayey hadh moodeen oo weli quraacdii lagulama soo kallahin. Waxa ay u noqotay fursad badhitaartay qorshahoodii.

Axmed iyo kooxdiisii si dhakso ah ayey wax isugu dubbarideen. Wiil ay saaxiib dhow ahaayeen ayaa gaadhigiisii ku taaageeray. Markii sida ay wax u jiraan loo sheegayba halkii uu joogay ayaa uu ka soo dhaqaaqay. "Halkee ayeynu tagnaa?" ayaa la is waydiiyey. Magaalada Jigjiga oo Axmed inaadeerkii degganaa ayaa la isku waafaqay. Subaxdii horeba waa lagu dhaqaajiyay. Waxa la isla gartay in inta Wajaale lagu hakado qaaddi loo yeedho, inta la socotaana markhaati u noqoto sidaana meherku ku dhaco--sidii baanay noqotay, reerna ku dhismay.

Intii ay taraagga ku jireen waxa ay isku maaweelinayeen heeso qaraam ah. Kuwo iyaga aad u taabanaya ayey qalbiga ku dejisanayeen. Hees ay Sahra Axmed ku luuqayso ayaa ka mid ahayd.

*"Naf ku jecel adduunyada*
*Baa u wacan wax nololiyo*
*Nabad lala wadaago*
*Nimco lagula waareee!"*

Gelinkii dambe ayey Jigjiga gaadheen markaas baa inta si wayn loo soo dhaweeyay la sooray. Cunto kala jaad ah iyo caano dhay ahna la soo hor qotonshay. Markay ka haageen ayaa hoy loogu talo galay lagu hooyey.

Inaadeerkii, maadaama uu ka warhayey xaaladdii adkayd ee uu soo maray, si foorjo leh ayuu uga tumay.

Reerihii ay ka yimaaddeen ayaa laga galay baadidoon. Waa la isku dhex yaacay, meel loogu hagaagana la garan waayey. Axmed walaashii oo subaxdaa quraacda ku qornayd waxa ay timid meeshii oo ah gelingelin cidla ah, oo mar hore laga guuray. Naxdin baa uu wadnuhu istaagi gaadhay, waxa ay u malaysay in walaalkeed lagu soo kordhay ama geeriyi qolka ka rartay. Bukaannadii jaarka la ahaa ayey war'raadis ugu tagtay. Waxa loo sheegay in aanay dhibaato jirin, walaalkeedna isaga oo cagahiisa ku socda uu ka baxay cisbitaalka. Qaylodhaan bay dirtay, afarta geesba raadco ayaa laga galay.

Habeennimadkii markii caruuskii iyo caruusaddii saldhigteen ayuu inaadeerkii soo hadlay. Reerkii la asqoobay maqnaanshiyahooda ayuu dejiyey una sheegay in uu isaga la jooga, sidoo kalena ay Deeqi weheliso.

Odaygii Deeqa dhalay isaga talo ayaa ku ciirtay; Axmed reerkooda uma tagi karo, dhibtii uu u gaystay ayuu ogsoon yahay; inantiisii ma hayo, meel uu kaga warramona garan maayo. Intii awooddiisa ahayd wuu girif girif leeyay, ilaa markii dambe loo sheegay in Deeqa uu la tagay wiilkii inta badan laga horjoogay.

Wax yar ka dibna waxa la soo hadlay odayaal, waxa ay u sheegeen in wiilkoodu uu la baxsaday Deeqa, sidaa darteedna in loo hibeeyo ay rabaan, wuu se ku gacansaydhay isaga oo ku andacoonaya in gabadhiisa yar laga dhacay: "Anigu gabadh aad xaddeen idiin meherin maayo", ayuu ku yidhi. Sidaasi markii ay dhacday ee la is afgaran waayey, odayadii ma quusan, dhinac kale ayey kaga soo wareegeen. Walaalladii ayey tilifoon u direen iyaga oo dacwo ah: "Dad gabadh la soo doonay isu diidi jiray ma nihin ee maxaa dhacay?" ayey ku garnaqsadeen. Deeqa adeerradeed markii ay arkeen in laga garjoogo ayey dalbadeen in wakhti la siiyo si ay war ugu soo celiyaan.

Odaygii diidmada qayaxan la soo taagnaa godkiisa ayey biyo ugu galeen. Weerar dhul iyo cir ah baa lagu soo qaaday. Tolkii baa isu bahaystay, xaajada in ay maanta iyagu goynayaan, juuqna aanu ka odhan, ayaa loo sheegay. Waxa uu isku dayey in uu ka muquurto, waa se laga diiday. Afka inta laga jufeeyay baa sandulle lagaga dhigay.Meel uu uga baxsado markuu waayey waxa uu ku qasbanaaday in uu aqbalo, waxa ay soo jeediyaanna uu ku ixtiraamo.

Odayadii dhinaca kale ayaa war lagu celiyay. Madal ilyartu is qabatay ayaa la isugu yimi. Halkii baa lagu hibeeyay, la isuna caloolxaadhay. Warkii farxadda lahaa waxa uu gaadhay Jigjiga. Alalasta iyo mushxaradda ayaa yeedhay, gaaf aroos iyo gaaddo-ka-ciyaar baa bilaambay. Guri loo gangaamay baa habeennimadkiiba la isugu geeyay. Wajiyadooda waxa ka muuqda farxad aan la qiyaasi karin. Naruurada iyo nimcada ay nolosha dhabta ahi leedahay ayey toos u dareemeen.

Markii ay ilaa saddex cisho aroos ku ahaayeen Jigjiga ayaa loo soo gelbiyey Hargeysa. Xaflad kale ayaa haddana loo qabtay, xidid iyo xigaalba waa laga soo qaybgalay. Dadkii goobta joogay farxad bay la qiiroodeen. Qiso jacayl oo in badan qoommanayd ayaa guushii qaabbishay. Markii fantisiyihii dhammaaday waxa isu soo hadhay lammaanihii is jeclaa. Neecawda macaan iyo laydha carfoon ee guurka ayey wada nuugeen. Waxa ay isla bilaabeen nolol kalgacal iyo isgarabsi ku qotonta. Shaqo la'aantii Axmed haysatay xal kaafiya ayaa loo helay. Goob uu ka hawlgalo, reerkiisana ka masruufo, ayaa loo agaasimay. Muddo markii uu qoyskoodu dhisnaa waxa ku soo biiray, oo Alle ku arsaaqay, wiil.

Ilmihii koowaad markii uu dhashay waxa bilaabantay isfaham la'aan. Farxaddii soo korodhay muran baa hadheeyay. Dareennadii kalgacalka iyo farxadda ahaa si yar si yar bay daaqadda uga baxeen. Qoyskii is jeclaa qulub baa soo kala dhex galay. Xusuusta waayihii adkaa

ee ay jacaylka u soo mareen ayaa qalbiyadooda ka tirantay. Qof kasta oo maqla isfaham la'aanta dhexdooda ka jirta uqaadanwaa bay ku noqotay.

Deeqi qaska dhacay waxa ay ku eedaysay Axmed. Dhaqankii wacnaa ee ay ku taqaannay in uu ku dheelay mid cusubna la soo baxay ayey qabtaa, waa se jacayl qiyaamihiisii dhacaye, dhowr jeer bay gurigooda u dudday haddana la soo celiyey.

Xidid iyo xigaalba in reerkaa la isku hayo oo aanu burburin ayaa la isku taxalluujiyey, waa se loo maaro waayey. Markii laga quustay, xaal waarana laga gaadhi waayey, in oodda loo kala qaado sidaana isku macasalaameeyaan, ayaa la isla gartay. Jacaylkii taariikhda galay gabbal baas baa u dumay.

Marka laba qof oo jacaylkooda lala tacajabay ay kala huleelaan, niyadjab baa kugu dhacaya. Waxa aad is waydiinaysaa sababta ay u kala dideen. Ciwaanka xiga kaga bogo waxa sababay arrintaas.

# BURBURKA JACAYLKA IYO SAAMAYNTA DABEECADDA

Mar walba waxa aynu aragnaa laba qof oo inta ay dareen kalgacal wadaageen isa siiyay ruuxdii oo is dhaarsaday, dhegonugaylka, dhibirsanaanta, tanaasulka iyo isu tudhidda dhexdooda ka unkamana lala ashqaraaro. Bal haddaba ka waran labadaa qof ee ceeshow milixda isku noqday haddii ay muddo ka dib is qoonsadaan, dibna u kala ruqaansadaan? Filashadii quruxda badnayd ee aad lammaanahaas ka qabtay sow niyadjab ku dambayn mayso?

Dhacdooyin badan ayaa laga soo weriyey dadyow inta ay jacaylka darajooyin ka gaadheeen haddana sallaanka dib uga dhacay. Inta uu wanaag jacaylku leeyahay shakhsiyaad kulansaday ayaa kala dhaqaajiyay.

Maadaama ay in badan firkanax iyo amakaag kugu reebeen qisooyinka laga soo tebiyo mucaashaqiinta sida niyadda ah isu jeclaaday ee haddana kala weecday, dibna aan isugu soo jihan, marar badanna aad u dhegtaagtay sababaha keena in la kala firdhado, waxa aad jawaabaha kaga bogan doontaa halkan.

Jacaylka iyo qofku marar badan ayey kala shakiyaan, qulub iyo qalqallooc ayaa dhex qaada, markaas bay is qoonsadaan, qiilna loo helaa sidii loo soo afjari lahaa xidhiidh jacayl oo udubkiisu muddo badan taagnaa.

Cadowga ugu wayn ee jacaylka waxa aynu u aqoonsanahay saddexeeyaha ama dadka, balse qofka laftarkiisu in uu is duqeeyo jacaylkana deedafeeyo ayaa ka wayn.

Marka qofka doonistiisa ku salaysan dabeecadda iyo jacaylku iska hor yimaaddaan, waxa dhacda in hubka la isu gurto, loollan adagina dhex maro, libintuna ay inta badan raacdo qofka dabeecaddiisa.

Cimriga jacaylku in uu soo gaabto waxa sababa saddexdan dabeecadood oo dadku u kala baxaan:

1. Dheefwadaag.
2. Dheefdoon.
3. Dheefsiin.

## Dheefwadaag

Qofka dabeecaddan lihi waxa uu la shir yimaaddaa qorshe ku salaysan wax wada qaybsi. In loo hagarbaxo isna uu wax huro ayuu u heellan yahay. Qof kasta oo nolosha la wadaaga si hoose ayuu u fiiriyaa, buug iyo qalin buu daba wadaaa isaga oo isku dhererinaya waxa uu bixiyey iyo inta lagu soo celiyay.

Erayada kalgacalka ah ee dhiniciisa ka soo fulaya waa in uu u helaa jawaab u dhiganta, haddii kale waa u qarracan. Hadyadaha jacaylka iyo deeqaha kale ee la isa siiyaa isaga way u xisaabsan yihiin. Haddii sida uu kuugu liso aanad ugu hambayn waxa uu dareemaa saluug, miisaankii uu watay ayaa dheelli ku yimaaddaa.

Xidhiidho badan ayaa uu si fudud u baabbi'iyaa isaga oo ku andacoonaya in la gacanbidixeeyay, waxna aan lala qaban ee ka xiiqsani isaga uun uu ahaa. Haddii uu wakhti kuu huro, kula qoslo, kaftan iyo kalaam qurux badanna kugula caweeyo, waxa keliya ee uu sugaa waa qaabka aad markiisa riyaaq iyo raynrayn farxaddeed ula qaadato. Haddii uu dareemo tacabka uu xidhiidhka geliyay mid ka yar in aad bixinayso, canaan iyo cadho aan kalajoogsi lahayn ayaa bilaabma.

Marka aad cabbirkiisa soo dhadhawayn waydo, digniintiisana aad dhayalsato, waxa suuragal ah in uu xidhiidhka u arko mid xagaldaacsan, dheelliga iyo dheeflawadaag la'aantana uu adiga kugu eedeeyo. Wixii uu bixiyay wax u dhigma marka uu waayo, jacaylkii dhisnaa ayaa la noqdo dheeldheel. Isaga oo dhalaalsan ayuu kala dhambalaa, dhababacona ku dhuftaa.

## Dheefdoon

Qofka dabeecaddan lihi waxa uu u dhaqmaa sida ilmaha yar. Waxa uu jecel yahay in sida cunugga yar loo habo oo hobbo' lagu yidhaahdo. Sida qof loo kasbado ee loo hanto hidde uma laha. Keliya naftiisu waxa ay ka raalli tahay qofka xeeriya doonistiisa ee u hagarbaxa. In la koolkooliyo oo isaga uun la daryeelo ayey farxaddiisu ku jirtaa. Haddii uu cadho dareemo waa in la sasabaa wakhti badanna la geliyaa sidii xaaladdiisa loo dejin lahaa. Wax kasta oo uu rabo haddii aan loo yeelin umaba noqoto, afka inta uu taago ayaa uu gafuurka buuraa. Xidhiidh kasta oo uu bilaabo waa kii tiisa ku meelmariya ta qofka kalena aan dhugmo u yeelan. Dhiggiisa in uu dheef ka helo mooyee waxtar uguma filna. Qofka dhiniciisa joogaa in uu ku tamariyo lagama yaabo. Jacaylka uu tallaalaana ma tisqaado.

Halkii dugsi iyo uu ka noqon lahaa daryeele, ka dardhanaya ee diirrimaadka iyo in bustaha lagu dedo u baahan ayuu noqdaa. Qofkani jacaylka waxa uu la dhaqmi karaa marka uu helo ruux aan isaga waxba ka sugin balse u hagarbaxa; shaqsi aan u fiirsan waxtar yaraantiisa balse inta uu ka roonaado daryeel u fidiya.

**Dheefsiin**

Qofka dabeecaddan lihi waxa uu leeyahay astaamo cajaa'ib ah. Ruuxa uu nolosha la wadaaggaa ma iisho, mana turunturroodo wuu se ku tamariyaa. Tabta hooyada ayuu u dhaqmaa una hagarbaxaa. Haddii qofka uu jacaylka la dhisayaa gaabis noqdo, xidhiidhkana jarjaro, isaga shiddo kuma hayso, waa kii heellan, mar kastana ku hawllan wanaajinta dhiggiisa.

Goor kasta waxa uu hubiyaa in arrimuhu u socdaan si hufan isaga oo ka dhowraya hantaaqada iyo wax kasta oo hagaasinaya dareenka kala dhexeeya ruuxa kale.

Waa qof jecel in uu huro wakhtigiisa iyo wax kasta oo qaali ku ah si uu u helo xasillooni gudeed. Xataa haddii aanad muxibbo kalgacal u muujin isagu kaama daalo ee waxa uu sii wadaa dabciwanaaggii iyo dulqaadkii aad uga baratay.

# GEEDDIGA JACAYLKA IYO GEDGEDDOONKA WAAYAHA

Muuse waa arday ka soo jeeda qoys danyar ah, duruufta iyo waayaha adag ee noloshiisa ku gadaamani marnaba kama hor istaagin in aqoontiisu sii hanaqaaddo. Fasalka afaraad ee dugsiga sare ayuu imtixaan u fadhiistay; waxa uu sugayaa natiijada. Waa uu is hubaa oo kama werwerqabo in uu buundo hoose keeno, waxa se culays ka saaran yahay geeddiga waxbarasho ee ku soo foolka leh; kharashka oo shan jeer kordhaya isaguna aanu itaal u hayn ayaa shiddo ku haya.

Maalintii dhibcaha uu keenay loo yeedhiyey waxa ku soo xoomay walaac iyo wixii werwer waayuhu ku waageeray. Waxa uu is tusay isaga oo tartankii aqoonta ee uu muddada badan u soo dhabar'adaygay dib uga dhacay. Aqoondarro ka reebi mayso ee aynigii isaga ayaa ugu tun wayn, waxa se loogu dawgalay bahasha lacagta la yidhaahdo. Ma hayo wadiiqo ku ridda halka uu rabo. Jeebkiisa oo madhan ayaa wegerta baday, balse Allewayne ayuu wakiishay si uu uga korqaado wakhtigan cakiran ee culayska walaal uga dhigay.

Raacdo dheer ayaa uu galay, cid kasta oo hayntooda uu tuhmayeyba waa uu la xidhiidhay, dalabkiisii dheg jalaq looma siin; quus iyo qarracan buu soo istaagay.

Markii xaaladdu ku cakirantay, qof kharashka waxbarashada ka kafaaloqaadana uu waayey, waxa ay asaxaabtiisu kula taliyeen in uu xooggiisa wax kula soo baxo. Halkee ayaa uu se shaqo ka helayaa? Inta karaankiisa ah waa uu isku dayay; darbi aan la mari karin ayaa ka hor yimi. Ma duni ehelnimo iyo qofaqoon wax la isku siiyo ayuu u badheedhi karaa? Xeerkii qabiilka iyo qoqobka ku dhisnaa ayaa qoobka ka xidhay.

Arrinkiisu waxa uu iskugu soo biyoshubtay halkudhiggii ahaa: "Cidina uma maqna ceelna uma qodna". Isaga oo caloosha ka gooyey jaamacad iyo gelisteed, ardaydii faciisa ahaydna mar hore ay is diiwaangeliyeen, ayaa Alle jid u bixiyey. Oday ay aabbihii saaxiib dhow ahaayeen ayaa soo wacay. Waxa uu ugu bushaareeyay war farxad leh; lacagta ku baxaysa jaamacadda in uu tunka u ritay, ayaa uu u sheegay.

Daqiiqadihii tilifoonka yididiilada xambaarsani ku socday, waxa ku soo goobtay dareen farxaddeed, rajadii naxashka saarnayd ayaa dib u soo noolaatay. Habeenka warka loo sheegay waxa uu ku naaloonayey neecawda aqoonta iyo nasrigii uu muddada badan sugayey oo soo daahiray.

Markii uu waagu sidaa u beryeyba jarmaado ayaa uu ku dhuftay, jaamacaddii oo isdiiwaangelintu weli socoto ayuu, cawadiisa, ku beegmay. Si wacan inta loo soo dhaweeyay ayaa arjiyadii laga qabtay. Nidaamka ay jaamacaddu wax u qaabbisho oo dhan buu durduro ku maray. Kulliyaddii uu doortay ayaa uu ku soo baxay. Whakhtiga uu bilaabi doono iyo fasalka loo qoondeeyayba hore ayaa loogu sheegay, markaas buu diyaargarow galay.

Wiilal iyo gabdho ayaa ay fasalwadaag noqdeen. Waa wajiyo isku cusub oo aqooni iskugu laaban tahay. Firfircooni iyo furfurnaan inta uu iska baadhay ayuu ardayda dhex galay, durba dhallinyaro ayay isla jaanqaadeen. Saaxiibbo ay kursiga ku jaaleen iyo kuwo kaleba waa uu yeeshay. In kasta oo uu nin iska af gaaban oo qajilaad badan ahaa haddana ma tudhtudh yarayn. Hablaha oo meesha ku yaraa ayaa siiyey jaaniska iyo kalsoonida uu isku muujiyey. Gabdhuhu in ay naqaska kugu dhejiyaan marka ay ku harqiyaan ma hadal baa ka jooga? Kayrkayrka iyo hadalka oo kaa soo bixi waayaba sow iyagu sabab uma noqdaan.

Shan gashaantimood oo keliya ayaa goobta ku weheliya wiilasha. Toban jeer ayaa lagaga badan yahay fasalka. Sedbursiinyo ayaa meesha ka dhacday. Iyagu se waa ay isku kalsoon yihiin. Geesinnimada ku jirta waxa aad ku garanaysaa halka ay isla taagan yihiin. Wiilashaba in ay ka sarreeyaan ayey isku haystaan. Gabannada hareeraha ka tuban hansal kama qaadaan. Meesha in ay ku yaraadaan

waxa sabab u ah aqoonta la baranayo. Horta cilmiga dhismaha iyo nashqadaynta guryaha dumarku miyey wax ku falaan?

Waa shan gabdhood oo bir finiin ka hadhay ah, fasalka iyaga ayaa ka hor libaaxeeya, wiilasha waxa ay iskaga xidheen geed. Maamulka kulliyaddu markii ay arkeen kartida iyo dadaalka midhodhalay ee ay la shir yimaaddeen, waxa mid ka mid ah horjooge looga dhigay kalaaska. Gashaanti Nimco la yidhaahdo, kaalinta koowaadna aan laga waayin, ayaa alifle noqotay. Waa geenyo inta ay qun u baxday dherer iyo dhumucba Alle isugu dheellitiray.

Ardaydu inta ay is dhex galeen ayey jiibta iyo jaanta isla heleen. Waa la is kaftan bartay. Maadda, qosolka iyo masaawaadka farxadda leh ayaa meerto u ahaa. Gole WhatsApp ayaa la samaystay si loogu wadaago casharrada iyo hadba wixii ku soo kordha. Codad wax la isku su'aalayo ayaa la isku duubaa. Hooskatuurka iyo kaftanka badhaxa tiranina xawaashka ayuu ku sii badiyaa. Inta codadka uun dhegaysata ee hoosta ka khaawista Muuse ayaa kow ka ah. Dhowr jeer oo golaha looga baaqay hadallo kaftan ahna lagu soo ganay waa uu ka gaabsaday. Qajilaad iyo xishood isu bahaystay ayaa u diidaya in uu laba eray isku toosiyo. Waa uu maqlayaa dacaayadda ku socota iyo codadka aan kalajoogsiga lahayn ee sida rasaasta ugu soo dhacaya, afkii baa se juuqda gabay. Kama aamuusaan, farriimaha gujada xambaarsan ayey u soo miisaan iyaga oo ku maadsanaya oo leh: "Muusow, ma hablaha ayaad

ka baqanaysaa, anagga ayaa odhan doonna la saayira ee soo gal", marka uu midi intaa soo duubo ayaa uu mid kalena u jawaabaa: "Waar Muuse hadal kuma jiro ee inaga daaya".

Nimco oo hablaha meesha ugu cadcad ka mid ahayd ayaa ka gubatay gujada ku socota Muuse, markaas bay luuqa farriin uga soo dirtay iyada oo guubaabinaysa oo leh: "Waar Muuse, ragga iske celi oo soo hadal inta meesha ku jirtaa cid kale ma aha ee waa ardaydii uune". Hadalkeedii waxa uu geliey kalsooni, xiniinyo ayuu iska baadhay, markaas buu sida gantaalka ku soo dhex dhacay golihii. Cod lala tacajabay oo duurxul iyo wax iska caabbin isugu jira ayuu soo laliyey. Intii awooddiisa hadalka su'aal gelinaysay firkanax ayey ku noqotay, intii kale ee Nimco ugu horraysayna waa ay ku diirsadeen. Maalintaas wixii ka dambeeyay ma dhicin in uu ka aamuso goobaha hadalka iyo hawraarta la isku waydaarsado.

Aqoonta rogroggeeda, ka rungaadhkeeda, rako sare ugu bixiddeeda iyo la rafiiqeeda waxa u dheer oo uu ka reeyay qajilaaddii uu muddada badan u maaro la'aa. Imika muxibbada riyaaqa leh ayaa uu kula dhex jiraa asaxaabtiisa.

Hablihii uu wajiga ka dadbi jiray qajilaad darteed ayey isku soo muruxsadeen. Dhoolacaddayn iyo qosol iska daba dhacaya oo aan hore looga baran ayuu madalaha ku qaabbilay. Gabdhaha ay isugu dubbadhacday waxa kow ka ahayd horjoogaha fasalkiisa. Maadaama ay Nimco kaalmaha hore ka soo muuqato isaguna uu yahay xariif is

Dhowr jeer buu is tusay in uu indhaha is qabto, badheedhihiisana caddaysto. Warqad iyo qalin buu soo qaataa oo erayo ku xarxarriiqaa, haddana wuu masaxaa. Tilifoonka ayuu inta uu naf moodo dhegta qabsadaa oo is yidhaahdaa fariinta u mari, marka ay ka qabato ayuu isku dhex yaacaa, odhaahduna ka soo bixi waydaa. "Waan ku salaamay", iyo "ma fiican tahay?" ayuu hadalka ku soo gabagabeeyaa. Marka ay wada joogaan kuma dhaco in uu u sheegto dareenkan gubaya, sidii caadada u ahayd ayuu iskala qoslaa, wakhtiguna ku dhaafaa maad iyo madaddaalo.

Goor iyo habeen waa ay wada hadlayaan, qulqulka fariimaha aan jacaylka xambaarsanayn ayaa xawaare sare isaga gudba, maxay se kuugu taallaa kol haddaan kurbadii haysay xal kaafiya loo helin.

Habeen Talaado ah ayaa Muuse saaxiibkii aroostay, dadkii gaafka ka shaqaynayey ayuu ku jiray, dumar la soo qaadayo iyo kuwo la celinayo ayaa xilkoodu saarnaa. Gaadhi ma wadan balse baabuurta joogtay ayuu kala hagayey. Markii la gaadhay xilligii caruusadda la soo gelbin lahaa ayuu gawaadhidii dhaqaajiyay. Gurigii aroosadda oo ehelkeedu heegan ku ahaayeen ayuu joojiyey. Intii baabuurta la korayey ayuu isaga oo dadka kala horaya hal mar ku baraarugay qof dhar cas ku labbisan oo dhinniciisa taagan. Jalleecadii uu eegayba wuu aqoonsaday. Waa gacalisadiisii oo qurux la tiicaysa, way isku naxeen, dareen farxad iyo muxibbo xambaarsan ayaa la iskula soo booday.

nacay, waxa ay iska kaashan jireen duruusta iyo layliyada loo diro. Talo iyo taakuloba laba isula taga ayey noqdeen. Fasalkii inta ay iska sheegteen ayey isku shubshubteen, hoos iyo sareba way isula showreen oo is sheeko fahmeen.

Ardaydii kale isku soo dhawaanshahoodii ayey tuhmeen. Badanaa marka wax la wada baranayo waxa dhacda in labadii qof ee isku bata la isku nabo, jacaylna laga dhexaysiiso. Balse iyaga tooda lagama beensheegin, waayo dareen qarsoon oo doonis ah ayaa dhex yaallay. Midba midka kale ayuu bidayey in uu dhiirrado xubbigana albaabka u furo. Nimco xishoodkii dumarka lagu yaqaannay ayaa gubaya, dareenka gudaha ku jira dibadda ma keeni karto. Waa kii waa hore Abwaan Axmed Saleebaan-Bidde yidhi:

*"Sidee bilis xishootaa*
*Runta ugu badheedhaa?"*

Wiilku ma mooggana in raggu gadhwadeen ka noqdaan marka ay timaaddo jacayl iyo in la sheegto, balse wuu baqanayaa. Inta uu sheegto in lagu shakaalo shibna laga yidhaahdo ayaa uga daran aamusnaanta. Rafiiqnimadii iyo qaabkii ay isku barteen ayaa arrinta sii murjinaysa. Sida macaariifta is taqaannaa ay jacaylwadaag u noqdaan sow wax adag ma aha? In uu yahay jirrab adag oo qofkii jiidhaa uu jawharad u dhacayo ma hadal baa ka jooga?

Waxa ay u sheegtay in gabadha la aroosayo ay ilmaadeer yihiin sidaana ay uga soo qayb gashay. Abaabulka iyo gurista dadka oo ahaa hawsha uu meesha u yimid ayuu u holladay, iyada iyo intii la socotayba inta uu gaadhi saaray buu ku shubay hoteelkii.

Markii alalasta iyo mushxaraddu isku dubbadhaceen, xafladduna cabbaar socotay ayey dibadda uga soo boodday. Waa qof jacaylkeedu u muuqdo e, sacabka iyo tiririgta durbaanka ayey xammili kari wayday. Muuse oo goobta ka ag dhawaa ayey raadisay. Baadigoobkii meel halkan ah isagoo fadhiya oo iska baraad la' ayey ka dul degtay. Maba filayn in ay goorahan soo baxdo e, waa uu ku naxay oo inta uu farxad kala batay gooni ula baxay, kuraas agtooda taallay oo cid fadhi ku cammirta u baahnayd ayey salka dhigeen. Erayo malab da'aya oo aad mooddo in ay shidaal ka qaadanayaan halbowlaha ayey isku liishaameen. Yagleelka qoyska ee madasha ay goobjoogga u yihiin ka socda ayaa cariyey jacaylkii ku dhex huursanaa ee ku khamiiray. Way isku hoobteen oo is huwiyeen weedho hamuun iyo hilow sida.

Jacaylkii laabahooda ku ciillanaa ayaa inta uu cartamay oodda soo jabiyey. Hal mar ayuu afkooda ka soo baxay boholyoygii ay muddada badan celcelinayeen. In rubadda iyo beerka la iska rabo oo la isku riyaaqsan yahay ayey isu sheegteen. Jawi qurxoon oo jacaylaysan ayey ku wada caweeyeen. Xiddigaha karkooda ka muuqda ayey daawasho ugu tageen markaas bay isla dawaafeen iyaga oo heestan qaadaya:

*"Doonnidii jacaylka aan raacnee*
*Haynala dawaaftee ku soo bood*
*Dusheedayn isku dawaan doonnaaa".*

Habeenkaasi waxa uu meesha ka saaray khaakhuulkii iyo dareenkii khatarka ugu jiray in uu hagaaso. Qalbiyadii baqashadu ragaadisay ayaa badhaadhe ku leday.

Subaxdiiba fasalkii ayaa la isugu soo galay. Xalay darbi adag oo kala hayey in ay iska leexiyeen oogadooda ayaa laga daalacanayey. Sidii hore isuguma ay soo dhiirran, in la fahmo ayey ka werwersanaayeen; "indho jacayl isma eegi karaan" ayaa xaalkoodu noqday.

Waxa qalbiyadoodu kolba soo celinayaan xusuusta darbigii ay jabiyeen; qaadaadhigga wakhtigii kala baqashada iyo xiisihii ku oognaa, iyo sida markii dambe la isugu bururay, jacaylkana oggolanaanshiyo iyo aag uu ka hawlgalo loo siiyey.

Muddo iyada oo jibbada cishqigu oognayd, xubiguna xawaare sare jarayey, ayaa xidhiidhkoodu u soo janjeedhsamay in uu afka saaro jidkii rejada ee lagu dhisi lahaa rug lagu tanaado iyo raas lagu nasto oo reero ku xididaan. Hanqalka uun bay la soo kaceen ee geeddiga halkii lagu furi lahaa ma dhawa. Sannadkii afaraad ee jaamacadda ayey afka la galeen, waxa sugaya mustaqbal aan laga gayoonaayn oo duruufo adagi ku gedaaman yihiin. Dhowr jeer bay ku tamanniyeen in ay is guursadaan.

Waxa karaarjebiyey oo kolba hoos u soo celiya waayaha iyo whakhtiga adag ee ay wajahayaan taas oo aan indhaha laga qarsan karin.

Wiilka oo caydh ah, meel uu u ciirsadaana aanay jirin, balse carcarta jacaylku ay hoosta ka gujinayso ayaa culayska ugu badan wajahaya. Qofka la rabo inuu jidbixiyaa waa isaga. Wakhtiga uu jilitaanka xubbigoodu socday oo dheeraaday ayaa jar-iska-xoorka keenay.

Markii ay dhowr gidaar ka soo go'een ayey garteen in waxa keliya ee xidhiidhkooda lagu badbaadin karaa uu yahay in ay samir gudoonsadaan, qaddartana ku qancaan, sidaana ku sugaan inta Alle farajkiisa u furayo.

Muuse oo goor barqo ah raba in uu ka taLlaabo jid gurigooda u dhow ayey maqaadiiri la kulantay. Gaadhi xawaare sare ku socda ayey waddada bartankeeda iska heleen, turuska hore ayuu ku qaatay, inta uu samadaa galay ayuu dhulka ka soo go'ay. Dadkii waddada ka ag dhawaa ayaa gurmad ugu soo xoomay, qofna niyaddiisa ma galin waa uu noolaanayaa balse isaga oo dhaqdhaqaaqaya ayaa loo yimi. Jug culus oo geeri uu uga baaqsaday ayaa gaadhay.

Labada lugood ayaa burburay, addinka bidix ha ugu darnaadee. Saablaydana waxa uu ka jabay laba feedhood, madaxana nabarro ayaa ka soo gaadhay. Dakaankii uu ka qaaday shilka ayuu la miyirdoorsoomay. Markiiba waxa loola cararay cisbitaalka iyada oo dirawalkii nabarka gaystay uu la socdo. Qaybta gargaarka degdegga ah ayaa la dhigay, daawayntiina loogu bilaabay.

Warka xumi ma negaadee, qaylodhaantii ayaa gaadhay jaamacaddii, Nimco oo xiisaddeeda iska wadata, balse werwersan oo is waydiinaysa sababta uu Muuse u iman waayey, ayuu dhawaaqii naxdinta lahaa sida dhimbiilaha ugu dhacay. Jacaylkeedii in uu nolol iyo geeri u dhexeeyo ayaa loo sheegay. Way kala qabowday, naxdin darteed ayey fadhiga ka kici kari wayday, hadalkii inta uu ku dhegay ayaa juuq laga waayey. Illin aad mooddo in ay sii diyaarsanayd ayaa dhabannada qoysay, hal mar bay isla boodday, inta ay fasalkii dibadda uga soo baxday ayey orod isa sii daysay, halkii loogu sheegay ayey u jihaysatay. Buugaagtii, boorsadii iyo moobilkeediiba miiska ayey kaga tagtay. Isma oga sidii qof la derderay bay is is dhaaftay, Judhiibana dhakhtarkii bay gaadhay. Dadkii ehelkiisa ahaa oo goobta tuban ayey durduro ku dhaaftay. Iyada oo xaalkeedu kacsan yahay hoosna u dhurmaysa, duco iyo weedho baroor watana is dhex dhigaysa, ayey nafteedii kuu hubsatay meeshii lagu baxnaaninayey, waa se laga hor istaagay in ay gasho. Waxa loo sheegay inta ay xaaladdiisu ka soo raynayso in aan cidna loo oggalayn gudaha.

Sugitaanka ayaa ku adag, waxa ay karaahiyasanaysaa inta ay taagan tahay. 'Allow yaa mar qudha ku tusa oo indhaha kuu saara!' ayey qalbiga kaga tawaawacaysaa. Ilmo ayey hiqda haysaa, tin iyo cidhib jidhkeeda dhidid ayaa qooyay. Hanfiga iyo kulka haysta waxa ku sii hurinaya aragti la'aanta iyo cidlada ay keligeed yuururto; agteeda qof murugada la qaybsadaa ma joogo.

Maalintii oo dhan bay ku dhammaysatay dhakhtarkii ilaa uu habeenkii ugu soo galay. Xaalku waa sidii oo wax isbeddel ah lama hayo, booqashaduna weli waaa mamnuuc. Bal haddaba inantii Nimco ahayd, gabbalkii dunye, yaa meesha ka kaxaynaya. Deeqa oo saaxiibaddeed ahayd, alaabtii ay sidii ruux waalan uga soo carartayna daba sidda, ayaa u timi: "Ina mari, walaal, iska hoyanno e, Muuse Ilaahay buu leeyahaye", ayey kolba ka ag tidhaahdaa. Xaalkeedu se waa shidanaaba shidan, uma jeeddo oo wadhaaba ma hayso. Agjooggiisa ayey taagga nafis ka dayeysaa. Biyo iyo gasiin dhuunta ma ay marin, dhibta haysata ayaa gaajadii illowsiisay.

Hooyadeed oo yaabban, tilifoonkeedana ku soo waalatay, ayaa goor dambe oo mobilka oo dansanaa ay fureen soo wacday. Canaan bay kala dul dhacday: "Xilligan xaggee baad meeraysanaysaa, shan mirir gudahood guriga aan kaa helo!" ayey amar ku siisay. Hadalka hooyadeed ma diidi karto e, 10-kii habeennimo iyada oo daal iyo diifi ka muuqdaan ayey qolkeeda sariir taalay is laabtay.

Subaxdii, markii waagu uu sidaa u beryey ee ay quraacda reerka u dubtay, inta ay iska dhigtay qof jaamacaddii tagaya ayey wista ka laabtay. Halkii laga filayey ma aha ee meel kale ayey ka fadkudisay, markaas bay dhakhtarkii toos u abbaartay. War farxad leh ayey ugu tagtay. In uu soo miiraabay, koomadiina ka soo baxay ayaa loogu bushaareeyay. Booqashadii baa loo fasaxay. Albaabkii inta ay garaacday ayey gudaha u gashay.

Qaar hore inta ay ka fadhiisatay, gacanteedana madaxa ka saartay, ayey si qiiro leh ugu tidhi: "Aad baan ugu faraxsanahay in aad indhaha kala qaaddo aniga oo korkaaga jooga oo weliba kuu jeeda, caafimaad aan baaqsan ayaan Raxmaanka kaaga rejaynayaa", inta ay dul fadhido illintinu way ka socotaa. Markii ay waxoogaa la joogtay; wakhtigii booqashadu uu dhammaaday; salaaddii duhurna ay taagan tahay, ayey sidii qof jaamacad ka soo rawaxay gurigii aadday.

Kama foodqaaddo dhakhtarka, inta ay gurigooda joogtana gaadhka ayey ku jirtaa. Gelin hore iyo ka dambeba goobta way timaaddaa. Lafihii jajabnaa ayey kabisi ku socotaa. Labada lugood mid ka mid ah oo laftu daqiiqda noqotay ayaa loo maaro la' yahay. Si wal oo wax looga qaban karo waa la isku dayey, quus baana laga soo istaagay. Waxa ehelkiisii loo sheegay in lugtaasi jarniin noqonayso, Muusena isu beddeli doono naafo. Ehelkii way ku adkaatay in ay si fudud u qaataan go'aanka lugta lagaga gaynayo inankooda.

Ninkii shilka gaystay oo gacanta ku hayey daawayntiisa ayey ka dalbadeen in uu wiilka Addis Ababa u qaado. Jeebkiisa oo iska ladnaa awgii, 'hawraar san' baa uu yidhi. Waxa ay qalqaalo u galeen sidii loo qaadi lahaa. Arrintaasi kama ay farxin Nimco oo ahayd qof dhibbane u ah xanuunkiisa, balse aan go'aan ku lahayn, sheekadana ku jilaysa dhuumasho; badanaa marka ay u imanayso indhoshareer ayey soo xidhataa, si aan loogu mashquulin.

Markii ay maqashay in dhakhaatiirtu soo hadalqaadeen in lug la jarayo, hoos bay u ooyday, way argagaxday, waxa ay sawiratay isaga oo laangadhe ah oo bir ku boodaya. Arrinta soo korodhay in jacaylkeeda ay xujo ku noqonayso ayey og tahay. Badanaaa marka laba qof oo jacaylka isla waday uu mid ka mid ah ku yimaaddo kala dhantaalan, waxa wiiqma xidhiidhka, dhiggiisana waxa soo wajaha culays iyo imtixaan ay adag tahay in la foosaa.

Lammaanaha sida dhabta isu jecel waxa lagu yaqaannaa in ay dhib iyo dheefba isla qaybsadaan, taasina waa xujada hor taalla Nimco.

Maalin Jimce ah, 9kii subaxnimo, ayaa loo qaaday Addis Ababa. Inta aan qolkii uu jiifay laga saarin, waxa si qalbitaabad leh u sii macasalaamaysay gacalisadiisii, iyada oo duco iyo dhiirrigalinba isugu dartay, dhegahana ugu ridday in ay la jirto oo uu mar walba garabkiisa ka eego.

Dhakhtar casri ah ayaa la dhigay; dhakhaatiirtii lafaha ee ugu aqoonta badnaa ayaa la tusay. Waxa ay qaadaadhigaan oo hadba dhinac ka fiirshaanba, natiijo gunaanad ah ayey soo saareen. Warka ay sheegeen qofna kama farxin—dhakhaatiirtii Hargeysa ayey isku af noqdeen. Lugtaasi in aanay wax ka qabasho lahayn ayey si cad ugu tebiyeen Muuse iyo waalidkii. In lugta la jaro ayey isugu soo ururtay, sidii baana la isku raacay.

Muuse waxa la soo gudboonaatay qaddarta Alle, meel kale oo uu uga cararaana ma jirto oo aan ka ahayn in uu isu dhiibo. Werwer hor leh ayaa ku furmay. Nolol

cusub oo caqabaddeeda iyo hawsheeda wadata ayaa u bilaabmaysa. Lugihiisii uu kolba mid tallaabada qaadi jiray ee uu ku xarragoon jiray ayaa is cidlaynaya; lugta soo hadhaa bannaan ayey keligeed istaagi doontaa; biro aan baahiyaheeda dhammaystiri karin ayey taageersan doontaa; socodkii quruxda badnaa ayaa dhutis isu bededli doona; meelihii uu durdurada ku dhaafi jiray ayuu tallaabada wakin doonaa.

Maankiisa waxa kale oo ka dhex guuxaya oo marnaba aan ka faaruqayn sida waaga cusub ee bilan doonaa uu u saameeyo jacaylkiisa iyo qaabka ay Nimco u qaabbili doonto. Ma cidlayn doontaa mise ciidan bay u noqon socodka ka caawiya? Marmar waxa uu is tusaa iyada oo garabkiisa ka baxday, dibna uga guratay. Rejobeel iyo niyadxumo ayaa qalbigiisa ku soo xaadira. "Haddii lugta iyo jacaylkuba is raacaan, hal marna aad ka farabaxdo oo meel cidla ah aad haabhaabato, maxaad yeeli doontaa?" ayuu is waydiiyaa. Waxa aad mooddaa in uu heestan niyadda ka tirinayey:

*"Xalaan soo baraarugay*
*Ka soo booday jiifkoo*
*Buur intaan fadhiistaan*
*Hurdo baadigobee;*
*Adoo iga baxsadayoo*
*Baashayga maray baa*

*Jacayl igu ballaadhee;*
*Waxa aan ka baqayaa*
*Ballantaan lahayn*
*In aad ka baxdoo*
*Baajiso wanaaggii".*

Balse ka waran haddii ay Nimco werwerka Muuse haysta ogaato sidanna ugu soo jawaabto:

*"Ha ka baqan warkeennii*
*Anaa baylahtirayoo*
*Kuu badheedhay adigoo*
*Ballantii adkeeyee"?*

Warkii ka yimi addisababa isaga oo aan geed soo hadhgelin ayuu toos u soo abbaaray Nimco. Heeryada inta uu dul dhigtay ayuu ku habsiiyey dhawaaq ay dhegaheedu dhibsadeen. Naxdintii darnayd, dhaawac uu jidhkeedu la gariiray ayey ku keentay. Markii lagu yidhi 'addin baa la jaray' ayey noqotay sidii ruux ay naftu ka gurmayso, inta uu wadnuhu shaqadii yareeyay ayuu qulqulkii dhiiggu is dhimay, markaas bay jaraysay oo cir iyo dhul meel ay joogto is kala garan wayday. Waa la bannaday oo hawadu ku xidhantay. Waa keligeed; qolkeeda ayey ku rafaadsan tahay. Marmar bay sida qof sasay isla oogsanaysay iyada

oo ku qarwaysa: "Ma Muusaa lugtii la jaray; alla maxay u jareen; ma dhacayso!"

Markii ay murug dhammaysatay ee laga kala degay ayey u soo kacaysaa waraysi iyo in ay hesho bal cid uga xaalwarranta gacaliyaheedii. In saaka qalliinkii uu galay oo naafoobay ayaa loo sheegay. Xanuunkii ku shidnaa ayaa ku sii laba qarxay. Tilifoonkii lagala xidhiidhi lahaa ayey baadidoontay; way wacday oo inta ay heshay la isku baroortay. Erayo kalsooni xambaarsan ayey dhegihiisa maqashiisay. In ay garabkiisa taagan tahay, dhib iyo dheefna la qaybsan doonto, ayey ugu laabqaboojisay. Sida uu jacaylkiisa u barriinsaday wadnaheeda ee ay laabta uga jeceshay, iyo sida aanay sikin qudha uga maarmi karin ee qalbigeedu u jamanayo, ayey u tebisay. Weedhaheeda qiirada sida ayaa toos u taabtay Muuse. Tiiraanyadii u ka qaaday qalliinka ayaa si yar si yar uga soo tirmay. Farxad iyo raynrayn ayuu dareemay. Neecaw qabow, oo aad mooddo in ay caafimaadkii ruuxda siddo, ayaa subaxdaa ay la hadlaysay saaqday.Wahabkii saarnaa ayaa jidhkiisa ka duulay markaas buu nashaad iyo firfircooni dareemay.

Muddo markii lagu baxnaaninayey dhakhtarka, biro uu ku socod bartana loo soo iibiyey, ayaa loo soo qaaday gurigooda. Usbuuc ka dibna waxbarashadii ayuu soo xaadiray. Ardayda fasalka oo xaalkiisa ka warqabtay ayaa fadhiga uga kacday. Waji ifaya oo farxadi maashaysay ayey ku soo dhaweeyeen. Dhaawicii si loo illowsiiyo, ilkaha ayaa dibnaha looga wada qaaday, markaas baa dhoolacaddayn aan dhammaad lahayn lagu qaabbilay.

Qofka ugu mudan ee dhiniciisa taagani waa Nimco. Niyad'dhiska iyo dhiirrigelinta marka laga yimaaddo, waxa aan is dhimin oo ay weli haaneedayaan doonistii kalgacalka weheshatay. Niyadwanaagga iyo nafqaybsiga kala dhexeeya gacalisadiisa ayaa dheef iyo dheregba ugu filan.

Waxa ay jacaylka isla wadaagaan oo isla taakuleeyaanba, waxbarashadii ayaa gabagabo ku dhow. Qalinjebintii ayaa kaabiga saaran. Nimco, oo guulo isdabajoog ah ka soo hoyn jirtay jamacadda, ayaa hanatay kaalinta ugu sarraysa kulliyaddii ay ka tirsanayd. Muuse laftiisu meel sare ayuu taagan yahay; waxa uu ahaa qof aan lagaga daba dhufan marka ay timaaddo cilmi iyo barashadii; balse wakhtiga ayaa ciilay. Qaddartii Alle ee ku timi ayuu la hagaasay. Meeshii uu hoggaanka u hayn jiray ayaa looga hurumaray. Ciil se uma qabo; qofka horkacaysa ee dadkaba ugu horraysaa waa waaxyihiisa mid ka mid ah.

Qaalidii uu ku dhaadan jiray ayaa la maamuusay, dhibcihii sare ee ay keentay ayaa lagu darajeeyay. Madasha qalinjebinta inta magaceeda laga yeedhiyay ayaa shahaado sharaf lagu taagay. Isagu goobta ayuu fadhiyaa, maradii madoobayd ayaa oogadiisa saaran. Qalbiga ayuu uga hanneeyay. Farxaddii ayuu birihiisii kor ugu kacay. Xaggii ay fadhiday inta uu tagay, ayuu si kal iyo laab ah ugu hambalyeeyay maadaama ay soo hoysay guul lamahuraan u ahayd isaga.

Maalmihii qalinjebinta ka dambeeyay labadoodaba jawi kii hore ka geddisan ayaa u bilaabmay. Midowgii iyo yagleelkii reerkooda ayaa u soo hiraya. Waxa se taa ka horraysa, oo ladh kulul ku haysa, sidii ay shaqo u heli lahaayeen. In qoys la dhisaa kharash badan ayey ku kacaysaa, Muusena isma bixin karo oo qoys danyar ah ayuu ka soo jeedaa. Isaga ayaaba laga sugayaa anfaaci in uu reerkooda ku soo kordhiyo. Naafonnimada ayaa shaqo helistii bir kaga sii dhigtay. Dhib ka wayni ma jirto marka aad la nooshahay duul quudhsada oo hoos u eega dadka baahiyaha gaarka ah qaba. Nolol cakiran oo siigo iyo ufo ku kicisay ayuu la daalaadhacayaa.

Labadooda kolba midkii shaqo helaa in uuu danahooda ka shaqeeyo ayey ku ballameen, balse midkoodna wuu ku salaaxi la' yahay. Niyadda ayey iska leeyihiin 'tolow dadku miyaanay dareensanayn duruufta nagu gadaaman, maxay noogu adkaynayaan?' "Horta lamaanaha jacaylka la soo kacaakufa ee halganka dheer la soo mara miyaan il naxariis leh lagu eegi jirin?" ayey is waydiiyaan, haddana iyaga ayaa isku jawaaba: "Oo yaa arrimaheenna hoose og!"

Haddii dhinaca Nimco loo ciirsan lahaa oo inta ay aabbaheed u tagto ay odhan lahayd 'wiilkan waan rabaaye ha la igu daro', waxa ay ka baqanaysaa in ay culays la kulanto oo laga kala kiciyo dareenkan gaammuray ee ay muddada soo yabyabaysay. Walaasheed ka wayn oo keliya ayaa la og xidhiidhkeeda, iyadana waa hore ayay is dhaarsadeen. In arrimaha sir lagu hayo oo aanay soo shaacsaarin ayaa laga ballamay.

Waxa ay qalbiga ka sawiranaysaa in Muuse si xarrago leh u soo doono, oo inta uu madal ilyartu is qabatay yimaaddo uu u soo geedfadhiisto, halkaasna aabbahaeed ku waydiisto. Taagga waxa ay is leedahay waxa aad ka nasan doontaa daalkii iyo diiftii aad jacaylka kala soo dabbaalatay. Xaflad kala kacsan in loo dhigaa waxa ay qudhgooyo ku tahay intii wada socodkooda saluugsanayd, iyo cid kasta oo qaab khaldan u arkaysay lana yaabbanayd sida ay u ugu adkaysatay in ay garabkiisa sii ahaato isaga oo naafoobay.

Oday Maxamed la yidhaahdo oo Alle mood iyo maalba isugu daray, afarta jeebna u buuxaan, ayey Muuse kulmeen. Meel waddo ah isaga oo lugaynaya, kulka jira awgiisna dhidid ku maydhay, ayaa Alle ku soo saaray xaajiga oo gaadhi V8 ah ku taagan, waddadana taxtaxaash ku socda. Dhinaciisa ayuu hal mar isha qac ku siiyay—mise waa wiil da' yar oo biro ku boodaya, socodkuna dhibayo cadceeda jirta awgeed! Istaaggii uu istaagay iyo "Adeer, aan ku sii dhaweeyee gaadhiga soo fuul", ayaa is xigay. Intii ay dariiqa sii socdeen ayaa la sheekaystay. In uu dhawaan qalinjebiyay welina aanu shaqo hayn ayuu u sheegay. Waayihii adkaa iyo marxaladihii uu nolosha la soo maray ayaa la iska waraystay.

Muuse waxa gashay rejo maadaama loo ballanqaadday in laga caawin doono in uu shaqo helo. Tilifoonkii baa la kala qortay, si marka hawshu diyaar noqoto loola soo hadlo. Laba cisho markii ay ka soo wareegatay ayaa la soo

wacay; wuu eegay mise waa xaajigii; farxad buu kala batay. Qabashadii uu qabtay iyo shaqada loogu bushaareeyay ayaa kulmay. Goobtii uu ka shaqayn lahaa iyo xilliga ay tahay in uu soo shaqo tago ayaa la isu raaciyay. Waxa uu ka hawlgeli doonaa 'Supermarket' wayn oo suuqa bartankiisa ku dhex yaalla, isaga oo maqalhaye/khasnaji ka noqon doona.

Warkii rejada galiyay ayuu la wadaagay Nimco. Aad bay u soo dhawaysay, yididiiladii iyo farxaddii ka muuqataynа ula qaybsatay. Maalinta xigta maadaama uu shaqada bilaabayo, waa ta dardaaran iyo duco ba isugu dartay. Wajifurnaan iyo hawlkarnimo in uu dadka kula shaqaysto, hawl kasta oo loo dirana sideeda uga soo baxo, sidoo kalena uu habsanka iyo habacsanaanta iska dhowro, ayey ku dhiirrigelisay, weliba waxa ay ugu sii dartay oo ku tidhi: "Shaqada xilligeeda joog oo ha ka dibdhicin, ammaanada laguu dhiibo ilaali oo ha lumin; hankaaga mid sare ka dhig oo hadba tallaabo horusocod ah qaad; dadkana dulqaad iyo debacsanaan kula soco oo qofna hadal dhiba ha ku odhan, hana yaraysan".

Ilaa laba bilood markii uu gooobtii lagu qoray ka hawlgalayey ayaa goor fiid ah, isaga oo shaqada ka soo rawaxay, aqalkooda hortiisa gaadhi taagan uu ku sii dhaafay, maba sharaysan ee guriga ayuu hore isaga galay. Walaashii ayuu waydiiyay baabuurka dibadda yaallaa waxa uu yahay. Waxa ay ugu jawaabtay: "Waxa saaran dad adiga ku doonaya". Wuu soo baxay oo qooraansaday mise

qofka gundhada u saaraniba waa jacaylkiisii. Farxad aanu filayn ayuu foolkafool ula kulmay. Agteeda hadyad ay ugu talogalashay in ay kedis uga dhigto ayaa taalla. Inta ay daaqadda ka furtay ayey ku tidhi: "Qaali, gudaha soo gal". Sidaadii uu u soo galayba waxa ay gacanta ka saartay fiyoore guduudan, bushqado ay alaab ku soo cabbaysay ayey haddana guddoonsiisay. "Halkan ma ku furi karaa?" ayuu waydiiyay. "Haa, dhibi kuma jirto", ayey ku tidhi. Kaadoogu saddex xabbo ayuu ahaa, mid kastana waxa ku jira alaab gaar ah. Markii uu sidaa u furay, waxyaabo cajab geliyey oo uu la ashqaraaray ayaa uu ugu dhex tagay. Macmacaan kala jaadjaad ah, dhar intii hal mar la isku taagi lahaa, iyo cadar midiba midka kale uu ka udgoon yahay oo carafta ka soo baxaysana aad qalbiga ka doogsanayso. Intii kale inta uu bacda ku riday ayuu macmacaankii kala furay oo la isla muudmuudsaday.

Kulankaasi waxa uu uga dhigan yahay sidii oo ay is guursadeen. Qaabka ay sheekadu isugu raacraacday ee ay isaga gurayaan ayaa laga garan karaa in dareen gudaha ka soo go'ayaa uu maayado soo kicinayo. Neecawda macaan ee ay habeenkaa ku naaloonayeen waxa ay ku ladheen oo u wehelinayay mustaqbal qurxoon oo ifafaalihiisa ay arkayeen, udduggiisana ay wakhtixaadirkaa nuugayaan. Heestii khadra Daahir ku luuqayn jirtay ayey ku tuurteen:

*"Sida laba is jeceloo*
*Laydhsanayaa fiidkii*

*Kalgacayl ku looloo*
*Laacdamaaya caashaqa..."*

Midowga nolosha iyo qorshahooda mustaqbal ayey isla soo hadalqaadeen. Xilliga ay yagleeli doonaan iyo qaabka ay hawsha u geli doonaan ayey sheekadooda ku saleeyeen. Shaqada uu Muuse hayaa ma ahayn mid si degdeg ah lacag looga ururin karo. In kasta oo uu hagbad galay haddana weli badh buu tebayaa oo tiradu ma saameelna. Wakhtigii ay soo jeedisay in uu meherku dhaco iyo kharashka u urursamaya ayaa is keeni waayey. Markii ay aragtay in arrimihu isu qaban la' yihiin gacaliyaheeda, waxa ay ballanqaadday in inta dhiman ay iyadu buuxin doonto.

Wax kale ma hayso e, walaasheed oo qurbaha ku maqan ayey lacag waydiisatay. Alaab ay u baahnayd in ay ku soo iibsato ayuu dalabkeedu ahaa. Lacagtii oo aanay isticmaalin, qasnadna ugu jirta, ayay ugu yaboohday gacaliyaheeda si uu hawlaha ugu debbaro.

Kharashkii uu hayey iyo intii ay ku dartay baa la isu geeyay. Xisaab inta la galay ayaa wax kasta oo qabyo ka ahaa ay dhammaystirteen. Maalmahaa ay qabanqaabada ku jireen waxa meel ay jaan iyo cidhib dhigtay la la' yahay Muuse gabadh ay walaalo yihiin oo da'dii ka yarayd ah. Beryahaa waxa socday tahriibka; in dhallintu u doolaan waddamada shisheeye ayaa aad u badnayd, iyaguna shakigaas ayey qabeen.

Werwerka iyo walaaca ay sababtay walaashiisa la waayey ayaa dhimay karaarkii uu ku socday qorshaha guurkoodu. Baadidoonka gabadha yar ee la waayey ayey caqli iyo cududba isugu geeyeen. Muddo bil ku u siman markii la raadinayey ayey ka soo hadashay Liibiya. Iyada oo afduuban gacantana ugu jirta niman qawlaysato ah ayey war argagax leh soo dirtay. Waxa ay u dhexaysaa nolol iyo geeri. Ragga haystaa ma aha kuwo naxaya. Madaxfurasho aan loo maaro hayn ayey dalbadeeen. Muuse ehelkiisu itaal uma hayaan lacagta la waydiiyay, balse way ku sandullaysan yihiin oo waa in ay meel uun ka keenaan. Haddii kale inantooda ayaa u qoolan oo qudhbixi karta.

Qabanqaabo iyo abaabul gabadha loogu gurmanayo ayaa la galay. Dhowr qof oo lacag lagu tuhmayey ayaa la isla soo hadalqaaday. Muuse oo qoyskooda ugu tun waynaa xagga jeebka, ayaa lagu ciiray. Haddii aanu isagu wax bixin yaa kale oo u hagarbaxaya walaashii? Intii yarayd ee uu dirqiga isugu geeyay ayaa lala haaday. Halkii uu u waday ma aha ee meel kale oo Alle u qoray ayey lacagtii aadday.

Dhibta soo foodsaartay ayaa guurkii uu naawilayey cirka ku laashay. Qaddarta Alle ee timi kama santaagi karo e, samir ayuu qaatay. Samatabixinta inantooda ayuu tab iyo xeeladba isugu geeyay. Madaxfurashadii laga rabay oo si adag lagu soo ururiyay ayey isu waydaariyeen magafayaashii. Muddo ka dibna Alle gacantoodii waa uu ka sii daayey; gabadhii yaraydna ma istaagin ee safarkii ay

Talyaaniga ugu jirtay ayey sii ambaqaadday.

Markii karku ka dhacay ayey lammaanihi is jeclaa dib isula hawlgaleen. Sidii hore ee xaal ahaa rejadoodu way ka liidataa; intii yarayd ee ay hayeen ayaa ka kala duushay oo waa hore loo tashaday. Yagleel iyo yabyab dambe ayey galeen. Wakhtigu wuu cararayaa, bilo iyo sannado aan wax laga waydiin ayaa socday. Ayuuto/hagbad cusub oo uu bilaabay ayey sugayaan. Lacagta halkaa gashaa sida ay ku tarantaa ma hawl yara. Wakhtigii wuu ku dheeraaday, waxna waa ay isu gaadhi waayeen.

Gabadhii Yurub u socdaashay oo inta ay Talyaaniga dhaaftay Jarmal gashay, ayey galab walaalkeed is waraysteen. Waxa uu uga warbixiyay dhacdooyinkii is xigxigay ee noloshiisa ku lammaanaa, iyo sida uu ugu dhabar'adaygay. Tii u dambaysay ee uu iyada uu ku samatabixinayey iyo wixii ka qabsadayay ayuu uga sheekeeyay. Gabadha uu jecel yahay oo aanay ka war hayn ayuu cabsiiyay. Aad bay ula qiirootay, waxyaabo badan oo noloshiisa ku gadaamnaa ayey ogaatay.

Jacaylka gaammuray ee uu walaalkeed la gebidhaclaynayo ayey garwaaqsatay, waxa aanay u ballanqaadday in ay dhiniciisa istaagi doonto, kana caawin doonto sidii uu ula aqalgeli lahaa gacalisadiisa.

Meel yar oo ay ka shaqaysaa ma aha mid kaafiyi karta kharashka ku baxaya guurka walaalkeed. Waxa ay bilowday in labada gelinba ay shaqayso si ay dhaqaale badan u samayso. Balanqaadkeedii Alle waa uu soo

dedejiyay. Muddo 3 bilood ah ayey kaga farxisay Muuse iyo Nimco oo la daalaadhacayey duruufo dhaqaale.

Kharashka intiisii badnayd iyada ayaa kafaaloqaadday, iyaguna intii yarayd ee hagbadda ugu jirtay ayey ku kabeen. Sidii baanay hawshooda isugu dubbariteen. Waxa ay niyadda kaga ducaysteen in aan wax kala tuuraa u iman oo Alle balaayada ka deyro.

Odaygii Nimco dhalay ayaa la wacay si looga doono inantiisa, isna hadalba kama soo celin ee 'marxabba' ayaa uu yidhi. Madal la qurxiyay ayaa la isku ballansaday. Muuse oo go' shaal ah iyo khamiis ku soo labbistay iyo odayaashiisii ayaa goobta uu meherku ka dhacayo soo xaadiray. Ehelkii Nimco ayaa iyaguna isa soo shubay. Si gobonnimo ku jirto ayaa la isu qaabbilay. Sida uu dhaqanku ahaa, inta gacanta la isu dhiibay ayaa inantii la hibeeyay. Reerkii dhismay ayaa duco loo miisay. Muuse iyo Nimcona sidaa ayey ku midoobeen.

# YAA U KALA WARRAMA?

Barxadda hoteel ay ku soo degtay ayey fadhidaa; koob sharaab ah ayaa hor yaal. Waa galab cirka daruuro ku shaqlan yihiin. Kobta ay joogto waa ku keli, cidla iyo caajis baa isu weheshaday. Ubaxyo iyo dhir cagaaran oo hareeraha ka xiggay ayey indhaheedu ku foofeen. Dhaayihii xayaabada ku mashquulsanaa ayaa hal mar guluubbada shitay, jalleecada ayey isha qac ku siisay wiil meel aan ka fogayn taagan. Way isla sarekacday oo ku dhaygagtay. Inta uu isaguna eegmo kalgacal ku soo eegay ayaa la isku indhobururay.

Eegmadii ugu horraysayba waxa qalbigooda xulay dareen xiiso kediso ah ku furay. Qofba halkii uu joogay ayuu ku qallalay; jaanta ma dhaqaajiyaan juuqna isuma yidhaahdaan. Iyadu in ay xaggiisa u hollato badheedhaheedana dhayda ka caddayso, ma awooddo; xishoodkii dumarka lagu yaqaannay ayey la hadoodilan tahay. Sidii ay isaga ka filaysay ayaa se dhacday. Inta uu awood iska baadhay ayuu xaggeeda u soo dhaqaaqay. "Walaal, iska warran; magacaa?" markii uu ku yidhi neef ayaa ka soo baxday. "Waan fiicanahay, magacayguna waa Nasra ee adigana?" ayey ugu halcalisayay, isaguna magaciisa

ayuu "Naasir" ugu sheegay. Erayo isbariidin iyo isbarasho isugu dhafan ayey sarajoogga isku waydaarsadeen, markaas baa cabbaar la kala bogtay. Lambarradii la iska soo salaami lahaa, xidhiidhka bilaaabmayna lagu beekhaamin lahaa, ayaa la isa siiyay.

Markii uu gabbalku dumay, dhawr saacadoodna laga joogo isbarashadii, ayuu Naasir soo wacay Nasra. War iyo wareegto wixii jira ayaa la isa su'aalay. Waxa ay u sheegtay in ay waddanka hal usbuuc oo keliya joogto. Waa qurbejoog soo xagaabaxday. Ehelkeeda oo magaalada ku nool ayey soo booqatay. Waa gashaanti guurujoog ah oo inta ay imika uun waxbarshadii dhammaysay shaqo bilowday. Qorshaha uguma jirin in ay haasaawe iyo rag hibashadooda u hanqaltaagtaa, balse laabteeda culan ayaa calmashada badday. Wiilka ay hawraarta iyo hadallada macaan is waydaarsanayaan waa qolqoljoog aan weligii dibadda u bixin, dalka ayuu ku tamariyey oo ku tacliinbartay. Daynabooyinka xumaada iyo qulqulka danabaysan sancadooda ayaa uu jaamacad uga soo baxay.

Sheekadii inta ay isugu dubbadhacday ayey jiibta iyo jaanta isla heleen. Waxa ay dareentay in ay heshay ruuxii nafteeda ku habboonaa. Su'aal kasta oo ay hibanaysay ayey u heshay jawaab kaafida. Maalmo kooban ayuu jacaylkii labadoodaba biyodhigay.

Marka laga yimaaddo isqancinta hore, waxa sheekadooda aad u sii bilay xurmada iyo ixtiraamka dhexdooda ka unkamay. Dhowr astaamood oo ay ku

hammiyi jirtay in ay ku aragto wiilka ay mustaqbalka la wadaagayso ayuu kulansaday. Erayo debacsan, kaftan aan turxaan lahayn iyo kalfurnaan ayey kala kulantay. Keligeed ma qanacsana ee isaga laftiisa waxa beerqaaday quruxda oogadeeda iyo garashada toolmoon ee xishoodka iyo dhawrsanaantu hu'ga u yihiin.

Muddo markii sheekadoodu maqal iyo muuqaalba ku socotay ayey hore u soo ruqaansadeen; doontii ay ku haasaawayeen ayaa soo istaagtay badda xeelligeeda; waxa ay qaadaadhiggii isla garteen sidii ay u falanqayn lahaayeen nolosha mustaqbalka ee sugaysa. Reer in la yagleelo ayey wiglada u tunteen. Isu heellanaanta iyo isla dhacsanaanta dhexdooda ka jirta markii ay arkeen, ayey is tusiyeen in ay isla qotomin karaan qoys lagu diirsado laguna qabowsado.

Noqoshadeeda oo dhawayd ayey dib u dhigatay; rejo wacan oo ay ka qabto jacaylkeeda ayey rabtaa in ay rumayso. Dhowr kulan oo ay arrimahaaa ku gorfaynayaan ayey wada qaateen. Iyada oo hawshu dhammaad ku dhowdahay ayaa arrin aanay kaba fikirini timi. Qabiilka oo intii ay haasawayeen soo hadalqaadkiisu yaraa ayey gundhada u galeen. Nasra ayaa uu qoladeeda waydiiyay. Waxa taa qasbayey dhaqanka Soomaalida. In labada reerood ee xididayaa is qabiil ogaadaan waa rukun culus oo ka mid ah ibofurka guurka. Gacalisadiisu waxa ay ka soo jeeddaa qabiillada la haybsooco, isaguna taa haabkaba ma gelin. Waxa ay ku noqotay lamafilaan. Shucuurtiisa

ayaa si degdeg ah isu beddeshay; hadalkii ayuu kari waayey oo ku dhegay. Markii uu juuq odhan waayey ayey ku tidhi: "Walaalo, maxaa kugu dhacay, anigu qabiilkayga uun baan kuu sheegayayee?" Inta uu hadalkii soo gabagabeeyay ayuu ku yidhi: "Walaal, aynu mar kale isa soo wacno".

Nasri, ma fahansana halka laga raacay. Waa qurbejoog aan arrimaha qabiilka u dhegraaricin balse dhacdo xidhiidhkeeda caqabad ku noqon karta ayaa hor taalla. Badwayn ay dad badani hore ugu hafteen ayey cagaha kula jirtaa. Haddii qabiilquudhsiga xal loo heli lahaa miyey didmaduba iman lahayd. Waa utun Soomaali oo dhan ku taagan in inta qabiil gaar loo sooco la gumeeyaa.

Habeenkaa uu ogaaday qabiilkeeda, Axmed, hurdo labada indhood isuma uu keenin. Waxa ku soo ururay walbahaar iyo walaac oo idil. Sheeko uu dhegta uun ka maqli jiray ayuu shaahid u arkay. Way ka baahday oo go'aanqaadashadii ayaa bir ku noqotay.Wakhtiga badankiisa waxa uu ku dhafray fajicisada ku soo korodhay. Laba wax baa naftiisa ku loollamaya: In uu xeeriyo dareenka kalgacal ee unkiddiisa uu wakhtigu ka galay, sidaana uu jacaylku ku guulaysto; iyo in uu raaco caado dhaqameedda silloon ee reerkaa lagu dayriyey, oggolaadana in uu burburo jacaylkii xididdada aastay.

Wax uu rogrogaba go'aan geesinnimo leh ayuu aakhirkii gaadhay isaga oo og culayska fuuli doona iyo canaasiirta ku kici doonta. Subaxnimadkii ayuu wacay Nasra isaga oo dhiirrani qaba, warkiisuna cad yahay.

Waxa uu uga warramay xalay iyo wixii shoogga ku riday. Dhawaaqa digniinta ayuu bixiyay, hadimada ku soo wajahan iyo halista ku hareeraysan ayaa uu u sheegay.

Dad qalbiyadoodu waa hore qafilmeen iyo marinno xanniban ayuu rabaa in uu tiisa mariyo. Nasri way garawsatay firinbiga uu gacaliyaheedu sare u yeedhiyay. Dabinnada aasan ee qabiilka in ay kala daadiyaan ayey la qaadatay. Maadaama waxani ku cusub yihiin, waxa ay waraysi ugu tagtay dad kale. Qof kasta oo ay la kulantaa waxa uu u soo jeediyaa in ay iskaga hadho xidhiidhkeeda. Sheekooyin hore oo fashilmay xalna laga gaadhi waayey ayaa la soo hor dhigay, dheg se jalaq uma ay siin. Waxa ay nafteeda ku qancisay in uu jacaylku yahay awood aan la waabin karin.

Hees ayaa hayd:

*"Dad baa jira waalanoo*
*Hadday wax is raba arkaan*
*Walaalaha kala dilee*
*Wed iyo calaf waxaan ahayn*
*Jacaylkeennaa ka wayn!"*

Markii ay gacaliyaheeda la wadaagtay sidii ay dadku uga falceliyeen jacaylkooda, waxa uu bilaabay in uu niyadda u dhiso. Erayo dhiirrigelin iyo dhinac-istaag u badan ayuu ku akhriyey—ilaa ay ka mabsuudday sida uu ugu heellan yahay iyo dadaalka uu wado, markaas baa ay taageero

laxaad leh u muujisay. Kalsooni aan shaki iyo shubahaad lahayn bay iskula shawreen. Hirdanka iyo harraatida ku soo food leh ayaa la isla faaqiday. Nasra, waxa ay soo jeedisay in, maadaama ay xaajadu sidaa u culus tahay, ay kaadsiimo ku daraan oo aanay ku degdegin. In muddo jacaylka la sii wada haaneedo oo aan carcarta hore lagu kicin, ayuu isna la qaatay.

Kulammadii iyo dhambaaladii is barkanaa ayey halkii ka sii wadeen. Baqashadii ay ka qabeen mustaqbalka ayaa jacaylkooda qiimo u yeeshay. Barroosinka ayey aasteen, markaas bay noqdeen ul iyo diirkeed. Intaa ay wada socdaan wareer iyo wadeeco midna ma ay qabin, balse war waxa uu joogaa marka ay sheekadooda shaaca ka qaadaan. Cabsiyi kama madhna, in ay badheedhaanna way ka go'an tahay. Arrintoodu waxa ay maraysaa xaggii heestii:

*"Dhuxul dambas huursan*

*Car, wir, ku dhac!"*

Balaayada iyo bixisada ka horraysa ayaa kayrkayrka badday, balse jacaylkooda oo dardaaran qaba ayaa raba in uu oodda jabiyo. Naasir oo fikirka in ay is biimeeyaan lahaa ayaa hadda raba in uu Nasra baro ehelkiisa. Inta aanu hooyadii iyo iyada is tusin waxa uu doonayaa bal in uu horta walaashii oo ka wayn reerna leh baro.

Qabanqaabadii ayuu hore ka galay. Labadii gabdhood ayuu kulansiiyay. Kaftan iyo sheeko isbarasho ku qotonta ayaa la is dhaafsaday. Maryan oo Naasir walaashii ahi wax badan ma oga. In walaalkeed mustaqbal dhisanayo ayaa farxad ugu filan. Furfurnaanta iyo dabciwanaagga gacalisadiisa ayey ka mabsuudday. Waxa ay hoosta ka leedahay: "Ilaahow, walaalkay riyadiisii wuu helay ee u rumee!" Intii kulanku socdayna dhowr jeer bay ku tidhi: "Naasirow, haddii in uun ruux nasab yahay qoftan baa ah ee xafido walaal, aniga aad bay ii cajabisay ee Alle calaf ha kaaga dhigo". In wanaagga gabadha lala arko ayuu dan moodayaa si aan hadhow loola anfariirin marka la ogaado cidda ay tahay. Balse maxay taasi kuugu taallaa, walaashii oo uu is lahaa way ku fahmi ayaa ku gacansaydhaye.

Markii is araggii dhammaaday ayey walaashii soo wacday iyada oo ku leh:

"Waaryee Naasir, inantii wacnayd, qabiilkoodii iimaad sheegine, horta yay ahayd?" Su'ashaasi cabbaar bay aamusiisay. Imika uun buu galay imtixaan sida uu uga baxaa ay adag tahay. "Waar dee noo sheeg, maxaa ku aamusiiyey!" ayey ku celisay. Naasir oo aad mooddo in shoog haystay ayaa hal mar isla booday oo yidhi: "Oo horta, walaal, miyaanan kuu sheegin qabiilkeeda?" "Xaggee baad iiga sheegtay, ma inakaa isla gaadhnayba!" ayay ku tidhi. Inta uu awood is geliyay ayuu warkiisa dhayda ka caddeeyay. Xilli la gabbado ma joogo ee waa kaa orod kaga baxay su'aashii jiirada la fuushay. Markii

ay ogaatay qabiilkeeda ayey sidan tidhi: "Walaal, malaha hadalkaa i dhinac maraye, reerkaasi miyaanay ahayn kuwii halkaa degi jiray ee aynaan kala guursan jirin?" Inta uu hadalkaasi dhibay ayuu si kulul uga falceliyey: "Yaa waxaa kugu akhriyey, miyaanad ogayn in ay yihiin dad Soomaliyeed oo aynu sinji iyo sawracba wadaagno?"

"Alla, walaal, meel daran Alle kuma mariyo ee halkaa ka joog, wax fiican laguma sheegayne!"

"Oo reerku, walaal, maxay qabaan?"

"Isku dad ma nihin, ismana guursanno ee ha ku qatalmin".

Markii ay hadalka isku taagtaagn ee uu arkay in aanu waxba marsiin karin ayuu cadhadii tilifoonka ku jaray. Nasra oo sugaysay ayuu wacay waxba se uma sheegin. Dhowr jeer oo ay wax ka waydiisay kulankii iyada iyo walaashii in uu faallo ka bixiyo wuu ka gaws'adaygay. Si guud oo aan u cuntamin ayuu uga warbixiyey. Iyana ma quusato ee waxa ay ku tidhaahdaa: "Gacaliye, walaashaa arrinkeennii ma soo dhawaysay mise way ku gacansaydhay?" War sugan ma siiyo mana aamuso; kolba gebi buu isku qaadaa. Durba waxa aad mooddaa in uu is dhiibay, gantaalkii ugu horreeyay ayaa kaga gariiriyey. Habeenkaas qof madfac qabsaday oo qamuunyoonaya iyo qof wax quuddaraynaya ayey kala ahaayeen.

Ufadii hore ee qabiilku waxa ay durba siigada ku kicisay Naasir. Dadka fooqa isa saaray ee wax quudhsanayaa waa cidaha uu ka soo jeedo. Hawsha ugu badani isaga ayey u taallaa. Markii dambe ee ay isla xiiqeen ayuu u sheegay wixii ka qabsaday walaashii. Niyadjabka ka muuqda markii ay aragtay ayey bilowday in ay qalbiga u dejiso. Waxa ay u sheegtay in aan weli la is gudagelin, haddii uu sidan u sii beerjilcana aanay geedkaa muuqda gaadhi doonin, sidaa darteed uu guntiga adkaysto. Habeenkaas si walba way ula hadashay—bal in uu helo dhiirranaan si aan dadaalkii uu waday u barriiqan.

Nasri waxa ay u ahayd kaalin uu shidaalka kaga shubto. Mar kasta oo arrinkooda darteed jug u soo gaadho xaggeeda ayuu u soo carari jiray, si uu qalbigeeda xalan iyo erayadeeda xariirta ah ee tusaalaha iyo tilmaanta xambaarsan ugu xasilo. Waxa ka go'an in ay hawshaa ka midhodhaliso; indho libiqsadaa kuma yaallaan.

Aqoonta ay baratay oo caafimaad ahayd ayaa bartay dhabar'adaygga iyo in dulqaad loo lahaado marka xaalado cusubi soo foodyeeshaan. Ka gungaadhka iyo isdhiibis la'aantu waa arrin ay ka ballameen, kuna wada socdaan. Maadaamaa uu guurkii surin cidhiidhi ah galay, wakhtiguna uu ku socdo Nasra, baylah badanina ka taal halkii ay ka timi, waxa ay gacaliyaheeda u sheegtay in ay safar u tabaabushanayso si ay arrimaha ka kala daadsan u soo nidaamsato. Iyaga oo dagaal dhexda ugu jira in ay socdaal gashaa way la yara fool xumaatay Naasir, balse

markii dambe way ku qancisay. Laba bilood ka dib in ay soo noqonayso ayey kula ballantay. Isagana in uu geeddiga hore u sii wado, socodkana aanu gaabin ilaa inta ay ka soo laabanayso, ayey kula dardaarantay. In uu u duceeyo, soo nqoshadeedana uu dhowro, ayey sidoo kale ka codsatay.

Carriga Ingiriiska ayey ka degtay iyada oo aan ahayn qofkii hore ee la yaqaannay. Dadkii soo dhaweeyay ayaa la yaabay isbeddelka ku yimi iyo jidhkeeda gurmay; miisaankeedii ayaa is dhimay, dheeheediina in uu doorsoomo ayuu u dhowaaday. Waa gabadh jacayl qoto dheer oo dhabannohays wataa uu dheegga ka galay. Filanwaagii iyo firkanixii ku dhacay ayaa fikirka baday, jidhkeediina feentay; faanoole se fari kama qodna.

Marka laga reebo walaasheed, qoyskeeda kale xidhiidhkeeda war uma hayaan. Hargeysa iyo sababta ay muddada badan ugu negaatay ayuu aabbaheed su'aalo badan ka waydiiyay. Xanuunka jacaylka la jaanqaaday ma ahayn mid gudaheeda ku qarsoomaya ee wixii ay haysayba bannaanka ayey soo dhigtay. Dhaawicii iyo dhibtii ay soo martay ayey uga qisootay aabbaheed. Iyada oo ilmaynaysa ayey u kala dhigdhigtay wixii qabsaday, markaas bay su'aalo garnaqsi ah ku gantay: "Maxaa sidan la inoogu galayaa; miyaynaan xaq u lahayn in aynu wax jeclaano; dadkan baas xaggee bay inagala qaadeen?" Hadallo qiiro wata oo ay ku qeexayso sida aan loo soo dhowayn jacaylkeedii ee loo qiimotiray ayey aabbaheed huwisay. Inta uu ilmadii ka tiray ayuu laabta geliyay. Waxa uu iska qoomameeyay in

aanu inantiisa uga sheekayn dabinnada qarsoon iyo kuwa muuqda ee qolada uu Naasir ka soo jeedaa u maleegeen reerkooda, mar kastana la damacsan yihiin. "Haddii aan u sheegi lahaa sow kama feejignaateen!" ayuu ku calaacalay. Markii ay oohin dhammaysatay ayuu hortiisa soo fadhiisiyey. In ay sheekada u soo bilowdo si uu xaajada gunteeda u ogaado ayuu ka codsaday.

Sida ay sheekada u waddo ayuu kolba ka dhex gala oo su'aal waydiiyaa. Waayo adag iyo wadeecooyin badan ayuu u soo joogay… Jacaylka inanta ku qufulan ayuu rabaa in uu qardhaas uga tolo balse hore ayaa loo yidhi, "wadaad dhir sitaana kaama dhufto, dhakhtarna kaama dhayo".

Markuu xaajadii bogtay waxa uu bilaabay in uu waaniyo isaga oo doonaya in uu ka weeciyo wadiiqada ay haysatay. "Inantaydiiyey, arrintaada aad baan uga damqaday, mid baan se ku odhanayaa: dariiqa aad haysato hore ayaa loogu jabay ee hawshaa iskaga hadh, dhib mooyee dheef ka heli mayside. Wiilka aad la socotana u sheeg in aydun kala haab joogtaan, sida aad qorshahiinna u hirgalisaan way adkaanaysaa. Markaa, aabbo, waxa aan kugula talinayaa in aad dib uga fadhiisato".

Isaga oo waanadii iyo ka digitaankii dhexda kaga jira ayaa tilifoonkeeda oo ag yaallay uu soo dhacay, mise waaba Naasir! Inta ay la booday ayey dibadda ula carartay. Sida ay ugu xiistay ee ay araggiisa ugu hilowday ayey ka hor gaysay. Xiisaha maqnaanshiyaheedu ku ladhay ayaa isagana ku cartamay, waa la isla besbeelay; jacayl ay xigsanayeen ayaa xoorkiisii hawada lagu dhamay.

Odaygii qolka ay kaga timidba way illowday, gufaacooyinka cishqiga ayaa ku cartamay, sheekadii iyada iyo aabbaheed qabyada u ahayd waa laga masaxay. Mar dambe ayey soo hambaabbirtay oo xaggii aabaheed u soo kacday. Odaygu se qolkii ay kaga tagtay waa uu ka baxay. Waanooyinkii uu waday in laga awood batay ayuu dareemay, markaas buu iska hurdo doontay.

Subaxdii mar ay is arkeen ayuu ku yidhi: "Aabbo, wax wayn baa kugu furan ee bal ii warran". Waanadii xalay iyo sida aanay u weelayn ee ay uga biyodiidday ayey uga warrantay. Jacaylka in ay la sii jalbeebato mooyee in aan jooji qorshaha ugu jirin ayey si cad ugu carrabbaabtay. Aabbaheed markii uu arkay sida ay ugu ad'adag tahay ee aan looga furfuri karin, ayuu iska dhaafay. Isaga oo aan ka raalli ahayn ayuu damaceedii dareenka jacayl ku salaysnaa faraha uga qaaday.

Maadaama ay aabbaheed arrinkaa isku fahmi waayeen waxa ay garowshiyo ka heshay hooyadeed. Hawlihii ku oognaa ayey hareerta la qabatay iyada oo kula dardaarantay in ay taxaddirto oo aanay aad u taraarixin.

Wax la tiriyey taag ma laha e, labadii bilood ee ay qabsatay waa ay dhammaadeen; shaqadii way fasaxday; waddankii bay u xadhkoxidhatay. Geedi bay u guuraysaa jacaylku la gaar yahay. Walaalladeed iyo intii arrinkeeda la ogayd ayaa soo tabantaabiyey, duco badanna u soo kiishay. Cidhib barako leh ayey ku soo dhufatay.

Hargeysa ayey soo cagodhigatay iyada oo kalsooni badan qabta. Qofka ubaxyada guduudan sida ee garoonka diyaaradda kaga hor tagay waa gacaliyaheeda. Salaan kalgacal oo sadriga ka soo go'day ayey isku sooryeeyeen. Maadama ay safar ka soo gashay, waxa la ballamay habeenka xiga in la isku yimaaddo. Kala maqnaanshihii waxa uu labadooda geliyay awood dheeraad ah.

Goor dambe oo fiidkii ah ayey baradii ay ku ballameen isku arkeen. Intii ay kala durugsanaayeen wixii is beddelay iyo sida ay gudagalka iyo ka midhodhalinta qorshahooda isugu bahaysan lahaayeen, horena uga sii dhaqaaqi lahaayeen halka ay joogaan, ayaa la isla jeexjeexay qurub qurubna loo kala dhigay. Qiyaastii waxa ay rabaan in inta ay gacanta is qabsadaan iyaga oo quwad wada jirta ah ay qasab ku jiidhaan cid kasta oo qalad iyo qardoofo kala hor timaadda.

Naasir oo intii ay gacalisadiisu maqnayd aan taayir rogin, ayaa imika waysada u biyaystay sidii uu guul la taaban karo u gaadhi lahaa. Wiil ay saaxiibbo yihiin oo arrintiisa bilowgeedii wax ka ogaa ayuu miciin biday. Garabqabasho iyo isdhinactaag buu ka dalbaday. Baaqii qayladhaanta kuma qasaarin ee saaxiibkii gacmo furan buu ku soo dhaweeyay. Hadda waxa uu helay garab, qof la fahmaya oo ficil iyo fikirba ku taageeri kara ayuu haystaa.

Hees baa ahayd:

*"Saaxiibka naftaada kula sida iyo*
*Miyaa la simaa ruux socoto ah?"*

Shaxda hawlgalkooda waxa ay ka bilaabeen odayga dhalay Naasir. Wakhtigii shaacinta maadaama oo la gaadhay, hawsha hore ayey ka galeen. Iyaga oo wada socda ayey toos u abbaareen aabihii. Maqaaxi uu galabtii qaxwaha ka cabbo ayuu fadhiyaa. Odayaal wada gadhcas ah buu dhexda ugu jiraa oo sheekadu isugu laba dhacaysaa. Meel aan ka fogayn ayey soo istaageen. Foosto biyo ah oo meesha u dhawayd ayey isku gudbeen; in ay halkaa ka qooraansadaan, marka uu soo kaco ee uu carraabo damcana ay dheegga dheegga u saaraan, sidaana warka ay sidaan biyodhiciisa ugu tebiyaan, ayey damacsan yihiin. Wax ay dhowraanba, markuu soo kici waayey ayaa Naasir oo aad mooddo in uu dulqaadkii ka dhammaaday oo kardhanaya odayadii isa soo dhex taagay. Inta uu xagga aabbihii u soo kacay ayuu ku yidhi: "Aabo, arrin baan kaaga baahanahay ee soo yara kac". Odaygii oo yaabban ayaa fadhiga ka kacay. Halkii uu saaxiibkii joogay ayuu ku hoggaamiyey. Markaas bay sheekadii ay qarsanayeen hortiisa keeneen. Sida ay uga go'an tahay in gabadhaas loo doono ayuu badheedhihiisa ku caddeeyay. Odaygu weli wuu amakaagsan yahay, waxba looma reebin. Wax kasta farta ayey ka saareen. Qabiilka Nasra iyo qaabka ay sheekadu ku bilaabantayba way isu raaciyeen, markaas baa uu ku margeday oo liqi kari waayey. Odaygii hal eray

bay kaga dhegtay. "Qabiilka inantu miyaanu ahayn kii caynkaas ahaa!" Dhegiba jaan bay leekaatay. Sheekada inankiisu falkinayaa filanwaa bay ku noqotay. Inta uu dhaqaaqay a yuu ku yidhi: "Anigu sheekadan gurracan ee aad bannaanka igu istaajisay garan maayee, caawa iyo guriga ha inoo ahaato".

Guriga hore ayuu uga didsanaa; uu ma rabin in inta ay qayladu is qabsato ka dibna la isku qabto oo dhinac laga wada maro. In ay aabbihii bannaanka iska helaan ayuu doorbiday balse gurigii uu ka baqanayey ayaa loola qayshaday.

Nasri sheekada hawada ayey kala socotaa oo tilifoonku kama damo. Dhiirrigelinta iyo hadallada dabka ku furaya jacaylkeeda kama kala dhinto ee dhegta ayey ugu riddaa.

Odaygii oo guriga kaga sii horreeyay ayuu isaguna soo galay, gaar bay isula baxeen. Sheekadii uu galabta u sheegay ayuu ugu celiyay. In uu gabadhaas rabo oo uu ku qanacsan yahay ayuu mar kale u sheegay. Aabbihii oo ahaa oday mayal adag oo aan dhayal waxa uu ka boodo lagu marsiin karin, cadka uu goostana aan laga fujini, waa uu ka soo hor jeestay qorshihiisii. Inta uu cadho cirkaa maray ayuu si kulul ula hadlay inankiisii. Canaan iyo handadaaad ayuu isugu daray. Naasirna dhinaciisa waxa uu la soo taagan yahay: "Anigu inantaas waan rabaa kamana tanaasulayo". Murankii isaga iyo odayga u dhexeeyay samada ayuu isku shareeray. Hadalkii baa ka taagtaagmay, buuqoodiina xaafadda intii joogtay oo dhan baa maqashay.

Hooyadii oo qayladu soo kicisay iyo odaygii oo leh 'dhiigkarkii baa igu kacay ee kiniin ii keena' ayaa kulmay. "Waar inkaari kuguma dhacdee maxaad aabbaha a dhiigga ugu kicisay?" ayey hooyadii ku tidhi. Intii kiniinka loo soo waday ayaaa lagu sii kordhay. Wadnaha ayaa qaraaca si xawli ah gawda u guray ilaa uu ka miyirdoorsoomay. Markiiba dhakhtar baa loola cararay si loogu fidiyo gargaarka degdega ah. Xanuunkiisa oo cuslaa awgii qaybta bukaannada daran ayaa la dhigay. Qof kasta oo guriga joogay Naasir buu eedda saaray, markaas bay huruuf kaga qaadqaadeen.

Walaashii oo uu hore ugu soo hungoobay balse in ay qariso oo aanay cidna u sheegin ay isku ogaayeen ayaa warkii odaygu gaadhay oo orod ku timi cidbitaalkii. In xanuunka aabbaheed uu isagu sidhinka ku dallacay ayaa lagu taabtay. Waxa ay markiiba fahantay in wixii uu iyada kala soo quustay uu odayga ula tagay. Iyada oo cadho jiq ah labada qawlalna ka xumbaynayasa ayey xaggii walaalkeed ka xigay u soo kacday. Umaba kaadin ee waa taa wixii ay u haysabay ku afrogtay: "Waar ma waxaagii xilka lahaa baad aabBo ula tagtay, miyaanad xishoonayn, maxaad dhiigga ugu kicisay?"

Markii uu arkay sida xaal yahay iyo sida loogu wada jeestay ee loo xagxaganayo ayaa uu goostay in uu meesha ka guureeyo oo dhakhtarka agagaaarkiisa ka dheeraado, saaxiibkii oo ka ag dhawaa ayey is raaceen.

Nasra oo aan dhowr saacadood warkiisa helin ayuu saqdii dhexe wacay. Qabtii ku dhacday ayuu la wadaagay. Cuslayskii hore u saarnaa mid kale ayaa ugu darsamay. Halganka ay ku jiraan in waxaa wax ka yar aanay ka dheefayn ayey ku calaacaleen, haddana waxa ay qalbiga ku adkaysteen in arrinta ay wadaan ay xaq tahay.

Habeenkaa wakhtiga intiisa badan waxa ay ku qaateen soojeed. Keligii ayaa dhex fadhiya guriga, dadkii kale dhakhtarka ayey tuban yihiin oo ku saamalayleen. Imtixaankii ugu cuslaa ayaa soo wajahay. Bixisada ku soo fool yeelatay in ay jid u bixiyaan ma hawl yara. Odayga haddii xanuunka haya uu ka soo doogo, rejo ay ku midoobaan uma muuqato, haddii uu aakhiraystana ugaba sii daran. Dhimashadiisa iyaga ayaa sababsan doona, waxa aanay ku noqon doontaa nabar ku yaalla oo aan dhayal ku hadhin. Sheekadooda waxa ay maraysaa laba daran mid dooro. Jahawareerka iyo jidgooyada loo dhigayo in ay u nuglaadan ama in ay jacaylka ku faro'adaygaan midhodhalkiisanakawarsugaanayaauuxaalkoodumarayaa.

Dhiiggii kacsanaa ee odaygu cirka ayuu sii galay, sidii loo dajin lahaa ayaa adkaatay. Miyir doorsoonkii uu habeen hore galay ayaa uu wali ku jiraa.tuunbadii cuntada iyo tii kaadida ka qaadaysayba waa lagu rakibay.

Muddo afar cisho ku siman markii nafta uun laga eegayey, rejada laga qabo in uu soo caafimaadaana ay meesha ka baxday waxa la isla qaatay in dhakhtarkan laga wareejiyo lana dhigo mid kale.

Cisbitaalkii cusbaa ee la dhigay markii uu saddex cisho yaallay ayaa uu soo miiraabay, balse waax ka mid ah jidhkiisa ayaa dhaqaaqii joojisay. Xanuunka qallajiyaha la yidhaahdo ayaa asiibay. Carrabku wuu cuslaaday oo hadalkiisa lama fahmayo.

Maadaama aan xanuunkani wax ka qabasho lahayn gurigiisa ayaa loo qaaday, si dawooyinka kaalmaatiga ah uu ugu qaato looguna baxnaaniyo.

Intii uu dhakhtarka yaallay waxa ay dadkii soo booqanayey is waydiinayeen xanuunka odaygu meesha uu ka bilaabmay. In la yidhaahdo: "Naasir baa ka cadhaysiiyay" way ku filnaan wayday. Erayada uu ku yidhi ee odaygu la duulay ayaa la baadigoobay. Walaashii oo sida wax u dhaceen ogayd ayaa is hayn kari wayday, waxa ay is aragtay iyada oo fatahday oo afka furatay, waxna aan qarin. Sheekadii baa siqday oo ku faaftay goobtii, markaas baa guryihiina la isku dhaafiyey ilaa qof kasta oo Naasir garanayey uu maqlay.

Naasir qaraabadiisu uma bogin warka soo yeedhay. Waxa la isku dayey in laga wardoono oo wax laga waydiiyo. Wuu ku indhocad yahay doonistiisa, qof kasta oo u yimaadda runta ayuu farta ka saaray. Xanuunkii aabbihii ku habsaday in loogu soo gabban ayuu ka digay. Eedda faraha badan ee loo soo jeedinayana laga daayo, maadaama qaddarta Alle wax ku dhaceen, isaguna aanu shuqul ku lahayn marka laga yimaaddo in uu wixii qalbigiisa ku jiray uu u sheegay, ee aanu waalid caasinnimo iyo jirab kale la iman.

Odaygii in uu dhinac dhan jiido, socodkuna ku adkaado, ayuu xanuunkii kaga tagay. Waa se talinayaa oo garashadii kama uu asiibin. Dhacdadii laga raacay ayaa uu niyadda ku hayaa. Marka uu soo xasuustana waa lagu kacaa, markaas buu inta uu xanaaq is cuncuno meel fog iska taaga Naasir iyo qorshihiisa.

Galab isaga oo kursi ku fadhiya ayaa uu u yeedhay inankiisa. Waxa kuu yidhi: "Waar i dhegayso, wiilow, anigu jirrada igu dhacday kugu eedayn maayo, qaddarta Alle ayey wax kastaaba ku dhaceen, balse haddaad sheekadii igu soo celiso geeri baan ka xigaa ee sidaa ula soco". Uma jawaabin ee inta uu sujuudda ka dhunkaday ayuu ku yidhi:"Insha Allah, arrimuhu khayr bay noqon, adiguna waad caafimaadi, idamka Alle". Waxa uu ka baqay haddii uu la sii doodo in looga sii daro oo dhiiggu inta uu boqol dhaafo dhimasho uu ku dhawaado; isagana eed tii hore ka culus loo soo jeediyo ka dibna la dayriyo, salaantana laga qaadi waayo.

Markii uu meel uu u ciirsado iyo qof uu garabka saaro ka waayey qoyskiisa ayaa Alle jid u bidhbidhiyey. Eeddadii oo qurbaha ku maqnayd ayaa timi. Markii warkiisu gaadhayba way u yeedhay si ay u xaqiijiso qaabka ay wax u jiraan. Garab'istaag iyo talo waayeelnimo in ay ku taageerto ayey diyaar ula tahay. Sida dadka kale ma aha qof ay reernimadu ku wayn yahay. Qoloqolada iyo qabiilquudhsiga waxa ay ka jeceshaahay oo ay ku dhaadataa in ay hesho qaran dadkiisu u siman yihiin,

xuquuq isku mid ahna ay leeyihiin, shacabkiisuna wax is qoonsada aanu lahayn.

Markii uu u tagayba waji farxad leh ayey ku soo dhawaysay. Warkii uu siiyey iyo noloshii adkayd ee uu soo maray ayaa ku dhibcay. Waxay ay la tacajabtay sida uu ugu dhiirran yahay doonistiisa ee aanu cidna uga gabbanayn. Waxa ay ku tidhi: "Waxa aan is lahaa inanka aad eeddada u tahay sidan oo dhan uma xiniinyo cadda, imika ayaan se xaqiiqsaday in aad tahay nin hal adag oo tiisa ku meelmari kara, hawsha aad ku dhex jirtaa ma hawl yara balse garabkaaga iga eeg".

Waxa kale oo ay u sheegtay in ay iyadu aabbihii kaga filnaanayso. Naasir aad buu ugu bogay laabqaboojiska uu eeddadii ka helay iyo gacanta ehelnimo ee ay u soo fidisay isaga oo ugu mahadceliyay: "Eeddo, runtii aad baan uga helay sida kalfurnaanta iyo kalsoonidu ku dheehan yihiin ee aad wax iila fahantay, in aan kaalin galo oo aan wax kororsdana aad u jeceshahay".

Eeddadii maadaama ay ku tidhi anigaa aabbo la hadlaya waa uu ka cudurdaartay, waxa uu u sheegay in aanay ku degdegin odayga; weli waxa ku jirta baqashadii hore iyo dhibkii la soo darsay. Balse eddadii codsigiisii gaashaanka ayey u daruurtay: "Eeddo, aniga ayaa kaaga aqoon badan walaalkay oo la soo koray; ii daaa adigu anigaa la gudhinayee. Haddii aad gabadh gayaankaaga ah calmatay ma khalad baa ku jira, muxuu la gebidhaclaynayaa! Dhaqanka qabiilna yidhi 'idinkaa dadka ugu sarreeya'

midna hoosta dhigay wax la sii eegto ma aha. Adiguna waxa aad noqon doontaa farash khayr leh oo Alle u soo diray in uu sabab u noqdo olalaha lagaga takhallusayo masiibadan ina haysata, insha Allaah".

Garabkii uu helay iyo warkii muusoodka xambaarsanaa ayuu u gudbiyey Nasra. Waa qofkii ugu horreeyay ee ehelkiisa ka mid ah ee ay aragto in uu garabkooda taagan yahay. Aad bay uga mabsuudday una soo dhawaysay. In uu la kulansiin doono ayuu u sheegay, iyaduna waa ay aqbashay. Markiiba kulan degdeg ah ayaa uu qabanqaabiyay. Eeddadiina inta ay ku raacday ayey weliba codsatay goobta lagu kulmayo in gurigeeda laga dhigo.

Iyaga oo wada socda ayey gurigii eeddadii daf soo yidhaahdeen. Shaah iyo sharaabba waa la soo hor dhigay. Casuumad laga shaqeeyay ayaa lagu sooray. Nasra, oo quruxda Eebbe ku mannaystay qofkii arkaa la ashqaraarayo, ayaa nuurkeedu gurigii wada qabsaday. Intii aqalka joogtay oo dhammi sida addoontaa loo abuuray ayey la indhodaraandareen. Eeddadii oo la amakaagsan bilicsamideeda ayaa Naasir ku tidhi: "Gabadh sidan u iftiimaysaa weligeed reerkeenna ma soo gelin, quruxdan oo kale ilays baa lagu raadiyaa, eddo. Caqliga ku yidhi 'ka fagow' been buu guuray, meel lagu nacaba ma iyadaa leh, xishoodka iyo xaqdhawrka ayey wax walba kaga dartay, Allow isku kiin daa beryo!"

Wakhti bilan iyo waalid labadoodaba boqray ayey habeenkaas ku naaloonayeen. Wehel aan la loodin karin, wadhida la badayna aad uga dhiidhiyay, ayey bogaadin iyo erayo barbar'istaag u badan kula caweeyeen. Marka aad wadiiqo yar keligaa qaaddo dadka kale oo dhammina hal waddo wada maraan ee lagu cidleeyo, sow qamuunyo iyo ciil dibnaha qaniini maysid! Nasra iyo Naasir waxa ay hayaan dariiq ay keli ku yihiin, joogtaynta iyo ku adkaanta go'aankooda ayaa sababay in eddadii ku soo biirto, dagaalkana ay meel ka wada galaan.

Ehelka ay Nasri ka soo jeeddaa qayb kama wada aha jallaafooyinka ku socda, xidhiidhkeedana kama madhna. Qaar ka mid ah ayaa la daba socda dibindaabyo iyaga oo saacidaya in uu guulaysto gulufka lagu soo qaaday. Waxa ay nusqaan u arkaan quudhsiga iyo aflagaaddada loo gaysanayo, sidaa awgeed bay uga soo hor jeesteen inantooda. Sidaas oo ay tahay haddana in badan baa jirta u heellan oo hiil iyo hooba la garab taagan, dadaalkeedu in uu guulaystana naf iyo maalba u huraya.

Dadka aadka ugu ololaynaya, halgankeedu in uu midhodhalona raba, wax ka mid ah eddadeed, iyada darteed ayey dibadda uga timi. Guri bay wada deggan yihiin, wax kasta oo xaalkeeda ka soo cusboonaadana waa u goobjoog. Tilmaan, toosin iyo talobixinba garab bay ugu tahay.

Aabbaheed oo isna meel adag iska taagay arrinkeedu wuu soo yara debcay. Waxba yaanu garab siinnin ee gujadii uu ku waday iyo dadkii ehelka ahaa ee uu bahalogelin jiray ayuu ka daystay. Inta ay la daaladhacaysay leebka ku taagan isaguna iyada ayuu eedda dusha ka saari jiray. Marar badan buu soo wacay una sheegay in ay iskaga hadho inankaas yar ee reerkoodu is xariifinayo. Waxa uu mar walba ku andacoonayey in gobannimodoonka ay u tafaxadaydatay ay ku hungoobi doonto, maxsuul ka soo baxana aan la mahadin doonin.

Ololihii xorriyaddu meel xaasaasi ah ayuu afka saaray. Labadii islaamood ee arrinkooda taabacsanayaa ayey damceen in ay kulansiiyaan. Waa laba qof oo qurbaha ka yimi. Mid kastaa halkeeda ayey kula safatay ilmihii ay waalidka u ahayd. Qalbiyadooda saafiga ah ee ka madhan xumaanta ayey ka midaysan yihiin.

Kulankii loo qoondeeyay ayey si foolkafool ah isugu hor fadhiisteen. Waa la sheekaystay oo la isu xaalwarramay; waayo hore iyo waxyeellooyin dhacay baa la iska waraystay. Nasra eeddadeed waxa ay soo faqday ficillo gurracan oo ay goobjoog u ahayd. Jariimooyin iyada lagula kacay balse ay hadda ka fayowdahay ayey ka qisootay. Iyada oo da' yar ayaa wiil ay arkootay laga hor istaagay. Waa ay u dhibtootay oo u dhakafaartay, xataa waxa la isku dayey in la dhagro, dabinno badan ayaa loo qoolay, si dunida loo dhaafiyona wax walba waa la isku dayey. dedaalkeedii se ma guulaysan. Soddon sanno ka

dib waxa ay goobjoog u tahay dhacdo teedii la mid ah oo ay marayso inanta uu walaalkeed dhalay.

Hogaggii ay ku dhacday ayey kala dagaallamaysaa in ay inanteedu dalaq tidhaahdo. Halgankeedii guuldarraystay ayaa ay rabtaa in ay fursaddan uga faa'idaysato, guulna u soo hoyso. Maamadii ka socotay xagga wiilku waxa ay garowsatay yeedhmadii xaqudirirka. In la is kaashado si wadajir ahna weerarka loo galo ayaa la isku waafaqay. Kulankaasi is'afgarasho ayaa uu ku soo gabagaboobay, lammaanihii la dulmiyey iyaga oo faraxsan ayey goobtii ka huleeleen.

Naasir eddadii iyada oo cadhaysan ayey u soo jihaysatay halkii uu joogay aabbihii. Qun yar wax uguma ay sheegin ee qaylo ayey ku bilowday: "Waar miyaanad Ilaahay ka baqanayn, maxaad wiilka iyo gabadha is calmaday cuqubada uga galaysaa?" Inta aanu jawaabin waxa qayladii ku soo baxday afadiisii--islaantu ma taabacsana odayga haddana arrinka uu gooyo kuma dhacdo in ay ay mucaariddo.

Ixtiraamka ay xaajigeeda u hayso ayaa qanjaha jooga, baqashana way u wehelisaa.

Inta ay odaygii ka soo jeedsatay ayay haddana cadhadii kula dul dhacday dumaashideed. "Odaygaaga ma waxa aad ku raacsan tahay godobta uu ka galayo carruurtan yaryar ee uu cidlada u saaray?" Markii ay labadoodiiba isu martay ayaa odaygii oo hadalkeeda u adkaysan waayay ku yidhi. "Gurigan anigaa iska leh, taladayda mooyee mid

kale kama soconayso ee ha daalin, gabadh yahay". Waa la murmay oo la isla tirsaday, markii uu hadalkii xidhmi waayey ayaa dib loo kala gurtay oo la kala dhaqaajiyay.

Waxa ay war ku celisay lammaanihii ka dhursugayey. Xalkii ay wadday in ay ku soo hungowday ayey u sheegtay.

Guriga Naasir waxa uu noqday meel laga soo unko hagardaamadiisa, haddii uu walaalladii u ciirsan lahaa garabkiisa ma joogaan, waxa ay la safan yihiin aabbihii. Caado nabsi weheshanaysa ayey gaadh ka hayaan. Ehelkii iyo xigaalkii kale ayaa iyaguna looga warsheekooday. In uu waalli ku dhow yahay, dhawaanna uu maryaha dhigan doono, ayaa ay qof kasta ka dhaadhiciyeen. Meel kasta oo la awoodi karayey in laga damqo waa la isku dayey; waxba loolama hadhin. Xanuunkii aabbihii iyo mayal'adayggiisa ayaa la isla xidhiidhiyay. In uu yahay mid inkaari ku dhacday oo habaar waalid qaba ayaa laga soo qaaday.

Meesha uu cagta saaraba erayo inkiraad iyo karaahiyo huwan ayaa lagu farraqaa. Jacaylkiisa cidi kalgacal iyo xiiso uma hayso. Gabdho ay walaalo yihiin iyagu waaba ay ka sii dareen oo inta ay weerarka isaga dhaafiyeen ayey u tallaabeen Nasra. Wax kasta oo ay walaalkood kaga reebi karaan ayey ku kaceen. Inta ay tilifoonkeeda soo heleen ayaa ay cay u miiseen, xataa waxa ay ugu hanjabeen in ay rifi doonaan, ifkana ku rafaadin doonaan. Narsi wixii ay dhurayeen waa ay ka gubatay. Inta ay wiirsi u qaadatay ayey dhexda giijisatay. "Waxa aad jeceshihiin sameeya, bal waa cidda aad wax kaga qaaddaan!" ayey ku tidhi. Waa la

is cariyey oo hawada la iska cunay. Carcarta horeba haddii ay wada joogi lahaayeen waa ay is ciijin lahaayeen.

Buuqii aloosmay waxa uu ku baahay labadii dhinac. Nasri hanjaabaaddii loo soo diray cid kale uma sheegin ee eddadeed ayey ku taabatay. "Ha u jawaabin, juuqna ha u odhan", ayaa lagu yidhi. Dadka farriimaha handadaada ah u soo dirayaa in ay dumaashiyaheed noqon doonaan ayey eddadeed ugu caqlicelisay. "Eeddo, inaku wax qaylo iyo isqabqabsi ka wayn ayeynu qabanqaabadiisa wadnaa, markaa dheg jalaq ha u siin dhawaaq kasta oo raba in uu kaa leexiyo jidka aad ku socoto. Guushu way dhawdahay ee garabkaaga yaanay ka bixin". Islaantu casharradii qadhaadha ee loo soo dhigay oo dhan bay inanteeda u marisay. Sida keliya lagaga gudbi karaa in ay samir iyo horusocod tahay ayey niyadda ugu dejisay. Dhiniciisa waxa isaguna aan yaraysan Naasir, hadallo debacsan oo dardaaran iyo waxsheegmo isugu jira ayaa uu ku dul akhriyay. Jidkii hore in aan laga leexan ayey talo ku soo ururiyeen.

Kooxda gobannimodoonka oo ka kooban labada dumar ah ee eddadda u kala ah lammaanaha, iyo Naasir saaxibkii, dib bay isugu noqdeen. Talo iyo tabaabusho ayey isugu yimaaddeen. Maadaama geeddigii la rabay in meel barwaaqo ah lagu furaa uu u jihaysaty qarfo iyo meel abbaar ah, wixii laga yeeli lahaa iyo sidii looga dabbaalan lahaa ayaa la gorfeeyay. Qofba halkii la qummanayd ayuu ku dhuftay. Guriga eddadii ayaa la fadhiyaa oo lagu shiraya.

Shaxda la damacsan yahay in la dhigaa ma aha mid sahlan. Naasir saaxiibkii talo uu soo jeediyay ayaa aakhirkii la isku raacay. In labada lammaane guurkooda loo hawlgalo ayaa la isla gartay. Aabbihii iyo adeerradii in lagala dhuuntò ayuu xaal isugu biyoshubtay. Iyaga la'aantood in gaadhiga la dhaqaajiyo ayaa lagu qalqaalo jiraa. Caqabad kale oo ay la dhutin karaan ayaa se soo foodsaartay. Odayga Nasra dhalay oo intii inantiisu dhibaatoonaysay aamusnaa ayaa hanqalka la soo kacay, diidmo qayaxan ayaa uu kala hor yimi: "Wiil reerkoodu aanay la socon anigu inantayda siin maayo", ayuu shardi uga dhigay. Sida aanay baaabbacada timo uga soo baxayn ayey u adag tahay in la helo Naasir oo odayadiisu la socdaan. Odaygu waxa uu ka digayaa masiibo soo socata. In gabadhiisu dhib la kulanto mustaqbalka ayuu ka cabsoonayaa. Balse damaciisii diidmada ku qotomay waxa biyo kaga shubtay walaashii. Canaasiir aanu filayn ayay ku kicisay. Hal mar ayaa dhinac laga wada maray. Islaantiisii, walaalladii iyo caruurtiisii ayaa isu bahaystay. Markii uu arkay sida ay wax u socdaan, halkii uu saarnaa ayuu ka soo degay. Baaqii xigtadiisa uga imanaayey ayaa uu aqbalay.

Hakadkii ku yimi in la fuliyo go'aankii la isla qaatay ayaa hore looga socday, yeedhmo kasta oo caksi ku ahaydna dhegaha ayaa laga furaystay. Maal iyo maskaxba inta la isu geeyay ayaa odaygii inanta laga doonay, isna 'maya' ma gelin ee hore ayaa uu ka bixiyey. Farxadii iyo rayrayntii ayaa la isu hambalyeeyay.

Guri magaalada koone kaga yaal ayaa inta loo kireeyay agab kasta loo dhigay. Arooskooda oo hore loo sii qorsheeyay ayaa la gudogalay. Iyaga ayaa isu cammiray mana rabaan in ay siraataan buuq loo soo raaco. Intii dhismahooda ka hawlgashay ayuun baa iminkana u mushxaradaysa.

Ehelka Naasir warkiisa wax waa uga baxeen balse meel ay kaga hagaagaan ma jirto. Waa hore ayey xeedho iyo fandhaal kala dhaceen, lammaanihii ay dayriyeen imika waa nin iyo xaaskii.

Markii gurigoodu dhisnaa laba bilood ayey Nasri u soo jeedisay gacaliyaheeda in ay magaaladan iskaga huleelaan. Carriga Ingiriiska inta ay tagto in ay u soo dacwooto sidaana ku dhoofiso ayay rabtaa. Markii ay sidaa isula afgarteenba hore ayey ka dhaqaajisay. Durba dacwaddii ayey bilowday. In uu Addis Ababa u soo wareego oo uu halkaa khadku uga socdo ayaa lamahuraan noqotay.

Markii dacwaddii lagu guulaystay inta London la wada degay ayaa la isku badhaadhay.

Cilmigii injineernimada ayey shaqo ugu raadisay. Waa xirfad baahi loo qabaye, dhulkaba lama dhigin; markiiba lacag badan buu ku shaqogalay. Waalidkii iyo walaalladii ayaa judhiiba qalbigiisa ku soo dhacay. Qof kasta halkiisa ayaa uu masruuf ugu qoray. Faaliggii odaygu la dhibbanaa safar dibadeed buu dabiib ugu diray. Markii ay arkeen sida aanu uga aargoosan ee uu ugu naxariisanayo, ayey u soo debceen. Ducadii ka baaqsatay oo dhan bay dib ugu kiisheen.

Naasir iyo Nasra hadda uun bay 'haakah!' yidhaahdeen. Guushii ay dhibta iyo dhalandhoolka u soo mareen ayey midhaheedii guranayaan. Waalid iyo walaalba goonyaha ayey ka joogaan oo waa loo dhan yahay.

# WAR LA'AANTA INDHOOLKA IYO WALBAHAARKA JACAYLKA

1970-kii ayaa uu Maxamed ku dhashay Hargeysa. Isaga oo markaas uun socodbartay oo laba sanno jir ah ayaa loo qaaday magaalo la yidhaahdo Xiingalool. Waxa ay ku taalaa baadiyaha degmada qadiimiga ah ee Ceerigaabo. Waa meel Alle ku mannaystay bilicsami iyo qurux dabiici ah. Saddexda meesi ee Soomaalidu dhaqato ayey hodan ku tahay oo muush ka ah. In uu ku soo barbaaro, ku kobco, kuna soo hanaqaado ayaa halkaas loogu dooray. Caano geel iyo hawsha reerka taal oo uu dhiniciisa kaga foofo ayaa lagu ababiyey.

Subax isaga oo, inta uu ardaaga geela caano ka soo dhamay, maqasha agteeda carruur kula ciyaaraya ayuun baa samadaa loola baxay. Xanuun aanu hore u qabin ayaa ku soo booday. Dabayl jaan baa labada indhood u saabisay. Indhihii carruurnimo ee quruxda iyo caafimaadka u saaxiibka ahaa ayaa illin mooyee wax kale laga waayay. Haydh'haydh baa galay wiilashii waafiga wax u arki jiray.

Markii xaalkiisu sii adkaaday, wadaad iyo waranlena la isugu tagay ee waxba laga qaban kari waayey, waxa loo qalqaaliyey in loo qaado magaaladii ugu dhawayd.

Ceerigaabo ayey kula ordeen. Cabbaar haddii la fiirfiiriyey waxba waa laga qaban kari waayey. Magaaladii xigtay ayey isu dhaafiyeen. Burco markii la geeyay iyana way ku hungoobeen. Dhibtii ku oognayd jawaab dhaymo u noqota kama ay helin. Inta ay kolba magaalo isaga dabqaadayaan ishiisuna way sii shiiqaysaa. Safarka iyo kolba meelaha ay ku hakanayaan waxa ay wiiqaysaa rejadii laga qabay in indhihiisu soo doogaan. Magaalada Hargeysa ayaa haddana la keenay. Dhaktarkii la dhigay natiijo ay ku qancaan kama ay soo bixin. Quus iyo wax ka qabasho la'aan buu la hor jimi. In sidaa lagaga hadho baadidoonka lagu soo celinayo indhihii fayoobaa iyo in geeddiga la sii wado ayuu arrinkii isugu soo biyoshubtay. Dalka dibaddiisa in lagula quusto ayaa la isla qaatay, markaas baa magaalada Cadan,Yaman, lagu sii daayay. Sidii ay filayeen waxba ma noqon; rejadii ay ka qabaneen cisbitaalka cusub ayaa god ku dhacday. Niyadjab iyo rjobeel buu warkoodu ku soo idlaaday. Ehelkii uu Maxamed ka dhashay isma dhiibin, safar kale ayey u qalabqaateen. Oddoroskii, dalwaynaha Ruushka ayey doorbideen. Dhakhtar ay sii ballansadeen ayey la beegsadeen. Baadhis dheer oo saacado qaadatay ayuu maray. Natiijo aan la mahadin baa haddana soo yeedhay.

Indhihiisu in aanay wax rejo ah lahayn bay go'aan ku soo saareen. Sida caadiga ah qofka xannuunka dabayshu ku dhacaa in uu saddexda cisho ee ugu horraysa wax ka qabasho leeyahay ayey u sheegeen; wakhtiga galbaday baa guuldarrada keenay.

Markii sidaasi dhacday waa ay soo guryonoqdeen. Maxamed waxa u bilaabatay nolol cusub oo indho la' aan ah. Muqdisho ayaa loo wareejiyay. Laqabsiga iyo lakacaakufka camoolannimada ayuu Xamar kula kowsaday.

Sannado ka dib mar uu Xamar la qabsaday, masiibadii ku dhacdayna aqbalay, ka dibna la noolaaday, ayaa goor fiid ah tilifoon guriga jaarkiisa ah ku rakibnaa looga yeedhay. Gabadh ay ehel ahaayeen ayuu ka qabtay. Iswaraysi ka dib, waxa ay ka codsatay in uu farriin ka gaadhsiiyo qof ay wayday. Maadaama ay mashquul ahayd qurbahana ay ku noolayd, isaga ayey u wakiilaatay in uu ka qaado dhambaalka. Lambarkii uu ka wici lahaa iyo farriintiiba inta ay isu raacisay ayey is macasalaameeyeen.

Dhawr jeer buu wacay oo uu waayey. Waxa uu isku hawlay sidii wixii la soo faray uu isu dhaafin lahaa; waa tii hore loo yidhi, 'farriini waa qaane', cabbaar ka dib waxa uu helay jawaab. Gabadh aad u da' yar oo cod macaan ayaa ka qabatay; farriinta gudbinteeda waxa u dheeraa oo dhex maray sheeko qurxoon oo kaftan iyo qosol ku lammaan yahay. Inta magacyada la is waydaarsaday ayaa lagu ballamay in la isa soo xidhiidhiyo. Guriga uu deggan yahay kuma xidhna tilifoon. Mar kasta oo uu damco in uu qof la hadlo, sida aabbihii oo Carabaha ku maqnaa, waa in uu aqalka ku xiga u wareegaa.

Gashaantidii ay ku ballameen in ay isa soo wacaan ayuu taar u diray. Waa sheeko cusub oo qacdii horeba la isku

qumbacdaye, si deggan oo hadalka loo kala nasanayo ayaa loo wada hadlay. Qosolka yaryar ee astaanta u ah marka ay laba qof is cajabiyaan oo lagu dhex daray erayo macaan oo maad iyo muxibbo xambaarsan, ayey soor isaga dhigeen. Su'aalo joog hoose ku duulaya, jawaabahooduna aanay soo daahayn, ayaa la is waydaarsaday. Waa la iska helay oo la is calmaday. Waxoogaa Markii erayo xallad leh oo xawaashku ku badan yahay la isku liishaamay, waxa la isla gartay in is wicitaanku joogto noqdo oo aan la kala faaruqin.

Maalin kasta waxa ay dulsaar ku ahaayeen oo ay ka wada hadli jireen xaafadda jiiraanka. Mar isaga loo yeedho iyo mar uu wacoba, lama kala foodqaado. Hadalku waxa uu noqday xidhiidh. Subax kasta sheekooyin hor leh oo nolasha qaadaadhiggeeda iyo qisooyin huwan ayey iskula soo kallahaan. Marmarka qaar waxa uu Maxamed gabadha uga sheekeeyaa taariikho iyo dhacdooyin jacaylka ku tacalluqa oo uu buugaag ka akhristay. Maadaama uu camoole yahay, dhiganayaasha cishqiga xambaarsan inta loo soo akhriyo baa uu dusha ka xiftiyi jiray, markaas buu u gudbin jiray jacaylkiisa. Waxa buugaagtaas oo aad loo xiisayn jiray wakhtigaas ka mid ahaa "Ma dhab baa jacayl waa loo dhintaa?" oo laga qoray Cilmi iyo Hodan, curintiisana uu lahaa mid ka mid ah carruurta ay dhashay 'Hodan' oo lagu magacaabo Cabdirashiid Maxamed Shabeelle. Waxa kale oo jiray buug laga qoray jacaylkii badwayn dhexdeed ka abuurmay ee Cawrala iyo Cali-Maax, magaciisana loogu wanqalay "Aqoondarro waa u nacab jacayl".

Laba buug oo iyana dhallintu wakhtigaa aad ula socdeen, "Idman iyo Sharma'arke" iyo Dhibbanaha aan dhalan", ayaa uu si taxane ah ugu marin jiray iyana ay ula socotay.

Jacaylkoodii qalbiyada ka bilaabmay ee aragtidu u dhinnayd wax uu sii socdaba, hadda waxa uu marayaa badwayn dhexdeed. Layla ma oga in gacaliyaheedu indho la' yahay. Dhowr jeer baa ay u soo bandhigtay in ay is arkaan isaguna uu ka muquurtay. Sababo u gaar ah buu samaystay si uu ugu qanciyo in wakhtigan aanu munaasib ahayd is'araggoodu.

Codsiga uga yimid gacalisadiisu waxa uu ku abuuray culays. Runta sheegisteeda maadaama uu ka baqanayey, waxa uu ka tashaday in uu yareeyo wakhtiga faraha badan ee ay haasaawaha ku qaataan. Wadasheekaysigii maalinlaha ahaa in uu usbuucle ku soo koobo ayuu go'aansaday. Xeelad dibugurasho ayaa uu ku dhaqaaqay. In uu jaamacad bilaabay oo wakhtigu ku yar yahay ayuu marmarsiiyo ka dhigtay. Reerkii jaarka ahaa ee ay iska soo wici jireen ayuu u sheegay qorshihiisa: haddii ay ka soo wacdo in lagu yidhaaahdo: "Maxamed jaamacad buu jiraa" ayuu ka dhaadhiciyey.

Naf wax jeceli wicitaanka ma dayso e, dhowr jeer oo dhawaaqeedu soo dhacay waxa loogu quusgooyey in uu jaamacad ku maqan yahay. Markii ay aragtay sida uu xaal yahay ayey nafteeda ku dirqisay sida uu rabo in ay u yeesho, toddobaadkiina hal iyo laba jeer ay kala

warhelaan. Xidhiidhkii xawliga ku socday in si yar oo fudud loo karaarjebiyaa waxa ay ku abuurtay kaar iyo kurbo siyaado ah.

Muddo markii uu xidhiidhkii goosgooska ahaa socday waxa ay soo istaagtay hadalkiina ku soo goysay in ay u baahan tahay aragti. Muuqiisa oo aanay wemli arag ayey u ooman tahay; ibtilida haysata ee uu la irdhanayo war iyo wacaal uma hayso.

Waxa uu hadba geed ugu gabbadaba, runtii ayey isugu soo ururtay. Xaqiiqadii uu inta badan daaha saarayey in uu toos u wajaho ayey xaajadu saldhigatay. Saaxiibkii oo arrimahooda u dhuundaloolay, mar kastana uu uga warrami jiray wixii ku soo kordha ayuu uga sheekeeyay halka ay gabadhii kala joogaan, iyo sida ay uga go'an tahay in ay is arkaan.

Markii uu xaajada rogrogay waxa uu talo ku soo jeediyay in ay arrinta xaqiiqadeeda toos u abbaaraan, inantana uu u sheego sida ay wax u jiraan. Dhacdadii Maxamed nugaylka iyo baqdinta ku abuurtay ayaa hal mar ka kala degtay. Fikirkii saaxiibkii ee ahaa wixii jiraba in ay bannaanka keenaan ayuu la qaatay. Waxa la isla gartay in inta uu waco uu u sheego in uu camoole yahay.

Maalintii xigtay ayey isu soo raaceen xaafaddii jaarka si ay u wacaan. Markii ay ka qabatayba Maxamed waxa uu isku dayey in uu uga warramo xaalkiisa; balse hadalba waa uu ka soo bixi waayey, wax uu yidhaahdona waa uu garan waayey. Hees baa ahayd:

*"Haddaan kuu jeedin laayoo*
*Jabka kuu sheegi lahaa*
*Awood baan jirin xaggaygoo*
*Afkii baa juuqda gabay!"*

Ka dibna saaxiibkii ayaa ka qabtay oo sheekadii la wareegay. Waxa uu uga bilaabay hogatusaalayn: "Abbaayo, jacaylka wax ka wayni ma jiraa? Ka warran haddii qof aad dhiigga iyo dhuuxaba isu shubteen uu kuu sheegto arrin dhaawac ku ah, muddo badanna uu qarsanayey; ma la dareemi lahayd dhaawaca mise inta aad kala dhantaasho ayaad jacaylkii inta badan dhisnaa ka dhaqaaqi lahayd?" Markii uu intaa ku yidhi ayey si qiiro leh ugu jawaabtay: "Abboowe, kama dhaqaaqeen ee inta aan la dhadhamiyo ayaan dhiniciisa istaagi lahaa". Waa sidii uu doonayey ee waa ku soo rogaalceliyey: "Abbaayo, Maxamed waxa uu in badan kaa qarinayey oo boog ku noqotay arrin isaga oo yar ku dhacay, qaddarta Allena sababsatay. Maxamed waa camoole ee ma ku qaadan lahayd?" Inta ay erayo dareen leh oo qalbi wax jecel ka soo baxaya ku tidhi: "Haa", ayey codsatay in Maxamed tilifoonka loogu dhiibo. Ka dibna way hadashay iyada oo leh: "Abboowe macaane, maxaad iiga qarisay in aad indhoole tahay, sow ma ogid in aynu nahay laba qof oo dhib iyo dheefba in ay wadaagaan diyaar u ah; ma kula tahay in xubbigii ay naftaydu ku xasishay uu ku cidleeyo oo uu kugu naco qaddarta Alle? Anigu waxa aan kuu hayaa ixtiraam aan is dhimayn, lagamana

yaabo in aan dhinacaaga banneeyo". Markii ay intaa tidhi ayuu isaguna u sharraxay sida uu ugu kalsoon yahay mar kastana uu uga filanayey go'aankan geesinnimada leh, intan yarna ay ahayd imtixaan iyo turunturro jacayl oo ay imikaba ka gudbeen. Ka dibna waxa ay ka wada sheekeeysteen sii ambaqaadka xidhiidhkooda iyo sidii la isu arki lahaa.

Waxa ay ballameen habeenka xiga in ay kulmaan. Sida caadada ahayd, magaalada Xamar inta ay dhallinyartu si fiican u labbistaan ayey shanta galabnimo bixi jireen; kuwo hasaawe u socda iyo qaar shaneemooyinka u daawasho tagayaba way iskugu jireen.

Waxa weheliya oo garabkiisa taagan saaxiibkii. Maadaama tilifoon gacanta lagu qaataa aanu jirin, qaabka keliya ee ay isku tilmaansan karayeen waxa uu noqday in ay dharka ay soo xidhanayaan midabbadiisa isu sii sheegaan, si ay isugu aqoonsadaan. Halkii ay ku ballameen ayey soo istaageen. Jardiinooyin u dhow Daljirka Dahsoon ayey calaamad ka dhigteen. Saaxiibkii ayaa indho u ah oo hagaya. Markiiba waxa uu dhugtay gabadh dhar cas ku labbisan oo goobtii ballantu ahayd taagan. Inta uu Maxamed gacanta qabtay ayey toos u abbaareen, gashaanti kale oo ay isa soo raaceen ayaa wehelisa. Bartii baa la isku bariidiyay.

Saaxiibkii oo hadalka xidhiidhinayey ayaa Layla u sheegay in wiilkan garabkiisa taagani uu yahay gacaliyaheedii ay muddada badan kala qarsoonaayeen.

"Maxamed, abbboowe, ma fiican tahay?" markii ay tidhiba waxa uu dareemay jidhiidhico. Si dareentaabad leh ayuu ugu halceliyay: "Abbaayo, waan kuu faayaa".

Inta ay gacanta qabatay ayey halkii ka dhaqaaqeen. Gaar bay isula faqeen. Sheekooyinkii ay inta badan wandaafinayeen ayey dib isula faaqideen, dareen xadantaynaya laabaha oo xiiso gaar ah xambaarsan ayey ku wada caweeyeen. Maxamed ma arko balse sawdkeeda macaan ee aad mooddo in la laxameeyay ayaa uga dhigan qurux oo idil. Heello ayaa ahayd:

*"Cishqigu waa dabayl duufaan wado oo*
*Dibnaha iyo saaran daymada!"*

Dareenka uu Maxamed ku caashaqay Layla, waxa uu ka unkamay erayada ka soo fulaya labadeeda bishimood. Iyaga ayaa wax walba uga dhigan. Qosolka yaryare e hadalka ku milani waxa uu qalbigiisa u dhex qulqulayaa sida biyuhu webiga u dhex qaadaan. Waxa taa sii bilaya sida ay layli ula dhacsan tahay una aqbashay xaaladdiisa gaarka ah. Dareenkii erayada ka abuurmay ayaa u sahlay in jacaylku dararo qalbigeeda, arrintii gacaliyaheeda culayska ku haysayna aanay dhib u arag.

Qalbiyo hibo jacayl oo dhab ahi ka muuqato ayey noqdeen. Kulankii qotada dheeraa ee xusuusaha ku qotomay ayay soo afmeereen. Saaxiibkii iyo saaxiibaddeed oo ka yara durugsanaa ayay xaggooda u soo kaceen; Maxamed oo dheeggeeda socday ayay dhanka saaxiibkii

iska xigsiisay, markaas baa 'nabad' iyo 'nooli kulante' la isku macasalaameeyay. Iyaga oo faraxsan ayay guryahoodii u carraabeen. Karkii iyo kuleylkii Maxamed saarnaa ayaa ka kala degay. Hadda uun baad mooddaa in uu jaceylkii toos ugu dhibcay. Shakigii uu ka qabay Layla ee walaahawga iyo werwerka ku abuuray ayaa dhan uga dhacey, indhihiisa oo aanu beryahaa illin ku arag ayaa nayaayir la hibitiqay. Riyo uu in badan sugayay ayaa u rumawday. Sidii uu ilo xareed ah iyo iloxir barwaaqo ah dhex joogo ayaa uu neecawda udgoon ee jacaylkiisu la kowsaday ugu ildoogsaday. Heestan baad moodaysay in uu niyadda ka qaadayo:

"Guushii aan hantiyay, allow hubaal iiga yeel".

Subaxnimadkii waxa uu ka wacay tilifoonkii, sheekadii musalsalka ahayd ee ay halkan ku soo gaareen ayay sii ambaqaadeen. Markan waxaad mooddaa in sheekadu milix yeelatay. Aragtidii habeen hore ayaa dhadhan macaan u sameysay. Xidhiidhkoodu marba marka ka sii dambeeya waa uu sii xuubdhacsanayaa, xiisaha ayaana sii labajibbaarma; doonista iyo dareennada cokan ee wadnuhu hoggaaminayo ayaa dhexdooda ku bulaalay. Tilifoonka oo aanay dhegta ka qaadayn marka laga yimaaddo, aragtidii ay ka maagayeen ayaa u noqotay joogto. Mar iyo lababa foolkafool ayay isu arkeen. Indho dareen ku shaqaynaya iyo kuwa aragtida ku doogsanaya ayaa kulma. Hummaagga Layla ee qalbiga Maxamed ku tallaalan ayaa u tebinaya taswiir qurxoon oo uu niyadda inta uu ka doogsado la khushuucayo.

Habeen iyaga oo shaleemo wada fadhiya, filim wacan oo jacaylku ku ladhan yahayna daawanaya, ayey Leyli u soo bandhigtay sheeko ka yaabisay; fajiciso iyo filanwaa ayey ku noqotay. Show waa bixisadiisa e, waxay u sheegtay in ay safar u baxayso. Dhoof in badan loo waday ayaa hadda soo dhawaaday. Maraykanka in ay u kicitanto ayuu qorshaheedu yahay, Maxamed se taasi uma cuntamin. Sidii in leeb lagu soo ganay ayuu uga gilgishay, balse waxba kama qaban karo oo ehelkeeda ayaa hawsha faraha kula jira. Iyaga ayaa u dooray halka ay tagayso maadaama qaar ka mid ah walaalladeed ay ku sugnaaayeen dalkaas. Waaa arrin adag wuu se ku qasban yahay in uu aqbalo. Habeenkaasi waxa uu u ahaa habbeen baas oo murugo iyo mugdi uu la soo hoyday. Gabbal baas baa u dumay. Inta ay shaneemadii ka soo baxeen ayey kala aadeen aqalladoodii.

Xusuuso aan kalago' lahayn ayuu dhex jibaaxay, sidii oo uu jaaheeda waayayo dibna aanu isha u saari doonin ayaa uu jalaaday. Kaydkii qalbigiisa ku jiray oo dhan baa uu dibadda soo dhigay, markaas buu tiriyay gabay uu ku xusayo sida uu uga xun yahay bixitaankeeda; sida aanu u raaci karin ee wakhtigu u ciilayo ayaa uu ku calaacalay; sida ba'an ee cishqigu ugu baahay; qaabka fudud ee ay warka ugu soo tebisay iyo sibiqdhaqaaqeeda ayaa ku noqday utun aan si fudud uga go'ayn. Waxa kale oo uu gabayga ku xusayaa sifooyin Layla u gaar ah. Muuqeeda aanu indhaha saarin ayaa uu haddana si cajaa'ib ah u kala dhidhigayaa.

Waxa aad moodaysaa in looga sheekeeyay oo dhabeelnimada iyo quruxda Eebbe ku mannaystay buug loogu dhigay. Sida muuqata, qalbigiisa ayaa inta uu curtay u gartay suuro ta ugu fiican ee gabadh lagu sifeeyo. Sida la soo weriyayna, waxa ay ahayd gashaanti dherer iyo dhumucba isu dheellitiran. . Isagu se taswiirtii uu qalbigiisa ku haystay ayaa uu toos uga faallooday. Markan oo kale waxa aad rumaysanaysaa in jacaylku qalbiga ka bilaabmo kuna dhammaado, erayada quruxda ku salaysan ee hablaha ammaanta looga dhigaana ay iska tahay uun qurxin balse aanay jacaylka go'aan ka gaadhin. Waxa uu maansada ku bilaabay siddan:

*"Sambabka iyo middii igaga tiil seedda dhabarkayga*
*Saableyda oofaha middii sax ugu meeraysay*
*Allaylehe Sitiin waxa ay rabtaa Yurub salkeediiye*
*Anna sacabku waa i madhan yahoo saabir baan ahaye*
*Si aan yeelo ma aqaan cishqina waygu saayidaye*
*Sidda sadder quraan bay qalbiga saaran tahay Luule*
*Allahayow adaa saatiree inanta hay seejin;*
*Sannadkii yimaaddaba hablaha sayniskaa mara Suugaanta iyo buugta waa lagu sifeeyaaye*
*Anna saaka taan caashaqaan sax u faallayne*
*Samsam weeye sawdkeedu iyo midhihii saytuune*
*Sinta timaha dhaafiyo wajiga sida tan loo uumay*
*Sanqaroorka dheer iyo gacmaha sayladh baxay la moodo*

*Sarajoogga laafyaah markay socodka haaneeddo*
*Markay gacmaha saydho eey sax u dhaqaaqayso*
*Sinnaanshaha Ilaahay u qoray waa mid saa'ida;*
*Midabkana siraad weeye iyo sagal daruureede*
*Nimaan soof adduunyaad lahayn Luul ma saayido e*
*Allahayow adaa saatiree inanta hay seejin".*

Gabaygaa markii uu tiriyey ayaa uu subaxdii maqashiiyey, si qushuuc leh ayey u dhegaysatay, weliba iyada oo baraad la' oo gabaygu inta uu taabtay isla maqan ayaa uu ku dul dhammeeyay.

Waxa ay u sheegtay in uu iska samro, maadaama labada Alle isu qoray aanay is waayi doonin. HadalLo kalsooni iyo laabqaboojin isugu jira ayey niyadda ugu dhistay. In kasta oo uu qalbijabsanaa haddana waxa uu muujiyay adkaysi iyo in uu shucuurtiisa kacsan dejiyo, una duurxulo oo uu ku yidhaahdo: "Gacaliso, kama xumi in aad dhoofto balse waxa igu kediyay bixitaankaaga, dareenka dhexdeenna yaalla ee aynu dhabar'adaygga iyo dhibirsanaanta ku soo wadnay ayaan u baqay. Waxa aan se mar walba ku niyadsamahay kalsoonida iyo jacaylka aan salguurayn ee qalbigaaga iigu kaydsan, waayihii iyo wakhtigii wacnaa ee aynu soo wada qaadannay ayaa ii ah xusuus. Qaadaadhiggeennii, isla qosolkeenii iyo wajigaagii furnaa ee wanaagga i fari jiray ayaa ila joogi doona".

Wakhtigii baa isa soo guray, waagii dhashaba waxa uu soo dhaweeyaa amintii ay dalka macasalaamayn lahayd. Hawshii loo waday way soo idlaatay. Dalkugalkiina waa ay heshay, nooligiii diyaaradda in ay bixiso sidaana ku duusho ayuun baa u dhiman. Sida caadada u ahayd, hadalka hawada la isu mariyo iyo kulanka foolkafool ka ahi ma ahayn kwo baaqsada; waa laba qof oo sii kala socda e, wakhtiga intiisa badan weedho qalbiga toos u taabanaya ayey qummaati isugu ganaan. Layla waxa ku loollamaya laba dareen; baradii ay ku soo barbaartay in ay ku huleesho iyo Maxamed oo ay garabkiisa bannaynayso. Halka isaguna uu la ildaran yahay tegitaankeeda, hawlihii isugu toosnaa iyo xidhiidhkii isugu dubbadhacay ayaa uu is tusay isaga oo cidla jaaqla ah ka jooga. Waxa uu ka baqay marka ay dhoofto in ay dibba ugu soo noqon waydo, sidaana uu ku waayo, haddana waa uu isu caqliceliyaa oo nafta u sheeggaa in aanay quusan, wakhtigu in uu u hiilin doono oo, mar ay noqotaba, uu is tusi doono ayaa uu niyadda gashadaa.

Maalmihii murugada sidii ay ugu jireen ayey ku wargelisay in ay tigidhkii diyaaradda soo goosatay. Markii ay intaa u sheegtay ayaa xummaddii haysay ay ku sii korodhay; qofka socdaalaysa ee magaalada ku cidlaynaysa waxa uu siisan lahaa naftiisa. Taariikhdu waa 1990kii, aaladaha lagu wada xidhiidhaa waa suququl. iyaga oo dalka wada jooga ayaa uu si uu ula hadlo reer kale u martiyi jiray, haddii ay dal shisheeye aaddayna arrimuhu waa ay sii murgayaan. Waxa kale oo iyana ku waynayd,

werwer hor lehna ku shidaysay, xaaladda uu dalku markaa ku sugnaa. Waa wakhtigii dawladdii dhexe burburaysay, dagaalka waddanka ka socday ayaa meel xun marayey, xiisaddu in ay sii xumaato mooyee ka soo rayn ma lahayn. Dalkiisii oo gubanaya iyo ruuxii uu dunida ugu jeclaa oo xilli xaalku ku adag yahay ka dhaqaaqaysa ayaa isu weheshaday, markaas bay murugo wayni la soo deristay.

Qorshaha Layla ee dhoofkeedu waxa uu ku taariikhaysan yahay 11 Abril, 1990. Maxamed oo maalintaa ka warhayey ayey mar kale xusuusisay in ay foodda ku soo hayso maalintii ay dhoofaysay. In ay is arkaan oo ay hore isula garteen ayey ka dhigteen habbeenka ay subaxnimadkiisa baxayso, sidii baana la isula waafaqay.

Waa habbeen qiiro iyo oohin xambaarsan, wajiyo foolkafool isu dhugan jiray ayaa kala dhaqaajinaya oo xusuuso ku wada noolaan doona. Markii la isu yimidba waxaa la isla galay waayo waayo iyo maalmihii wacnaa. Caawa oo kale waa habeen ku wanaagsan in la naqtiimo casharradii ay hore isugu soo dhigeen, sida oo kale la furo bog cusub oo ibofur u noqonaya nolosha u bilaabmanaysa iyo sida ay wax noqon doonaan. Qaabka ay u soo wada xidhiidhi lahaayeen oo Maxamed shiddo ku hayay ayey xoogga saareen. Haddii Alle nabadgeeyo in ay soo xidhiidhin doonto ayey u ballanqaadday. Maadaama ay berry abbaaro 2-da duhurnimo dheemaalayso, waxa ay isla qaateen in ay soo wada hadlaan wax yar ka hor inta aanay gegida diyaaradaha tegin.

12-kii duhurnimo markii ay saacaddu cagacagaynaysay ayaa uu soo wacay Layla oo is diyaarintii ugu dambaysay ku jirta. Casharradii jacaylka ayey mar kale is cabsiiyeen, is calmashadoodii cuddoonayd ee qalbiyada isu caafimaadka qabaa isu celcelinayeen ayey cabbaar xuleen. Iyaga oo hadalka bartanka kaga jira ayaa raadiyow ag yaallay oo barnaamijka *salaamaha iyo heesuhu* ka socday ay soo daayeen hees qalbigiisa taabatay. Erayada heesta iyo xaaladda ay ku jiraan ayaa si isula jaanqaadayey. Dhawaaqa dhegihiisa qabsaday ee raadiyuhu kaga dawaminayaa waa heestii uu Cumar Dhuule ku luuqayn jiray:

*"Walow aan asaaggaa*
*Adiga kuugu jecelahay*
*Oo aad Ilwaad-qurux*
*Adiguna ogsoon tahay*
*Afka uun kama lihi ee*
*Ay uurka iga tahay,*
*Haddii waa aduunyee,*
*Aad iga irdhowday*
*Oo axdigaynu dhiganniyo*
*Wacadkii illowday*
*Ifka inta aad ku nooshahay*
*Kaa aarsan maayee*
*Amaana Alla inan yahay*
*Aakhirana wayn*
*Isku ari doonnaa".*

Heestii iyo tegistii inanta ayaa isu bahaystay. Jidhidhacadii saaqday ayuu is madaxmaray ka dibna miyir doorsoomay, tilifoonkii uu gacanta haystay ayaa dhulka kaga dhacay. Jugtii yeedhay ayaa ay maqashay gabadhii guriga lahayd oo Nuura la odhan jiray, markaas bay inta ay naxday oo xaggiisa u soo kacday ku tidhi: "Abboowe, maxaa kugu dhacay?" Waa nin istiil ku dhimanaya e, show markiiba inta uu tilifoonkii soo qabsaday ayaa uu sheekadii sii watay, markaas buu ugu jawaabay: "Abbaayo, waxba iguma dhicin". Tabantaabintii iyo dardaarankii uu farayey gacalisadiisa intii uu waday waxa ku soo kediyay oo hoosta ka soo gujiyay gabay. Iyada oo la leeyahay diyaaraddu yaanay kaa tagin ee soo bax, wakhtiguna ku yar yahay, ayuu ka codsaday in uu gabay ku dul akhriyo, iyana ay si dareen leh u dhegaysato.

Tix cajiib ah oo qalbigeeda xushay ayuu hawada uga soo mariyey. Sida caashaqu qofka uu helo xubnihiisa u nugleeyo, cudurkana ugu abuuro, iyo sida inta uu ceesh oo idil kaa cesho cidaamkaaga u ruugo, ayuu ugu alaleday; iyo sida marka uu codkeeda maqlana uu aragga uga cawdo ee uu Alle uga tuugo in indhaha caadka looga qaado si uu u arko. Mar uu jacaylka uu u bahalogeliyo oo meel harraad iyo hanfi loogu dhimanayo ka soo qaado, iyo mar uu iyada ugu calaacalo sida uu u jecel yahay, aragtideedana ugu doogsado, ayuu maansada ku qotonshay. Sidan ayaa uu ku bilaabay:

*"Inanyahay cishqqigu waa beliyo, caashaq kuu yimide*
*Waa cudur lafaa kaa galiyo, meel an la caddayne*
*Waa cudur calooshiyo wadnaha, caalidh ku abuure*
*Waa cudur cuntada kaa jariyo, ceeshka oo idile*
*Waa cudur qofka uu caawa helo, lala cajiibaaye*
*Waa cudur hurdada kaa ceshoo, aad caddibantaaye*
*Intaasoo calaamadaa ayuu caashaq leeyahaye*
*Cilmi waa isagii hooyey ee, Layla ciid dhigaye*
*Anna caynaddoodaan ahoo, ciriq i naafeeye*
*Cisho noolba adigaa qalbigu, kula caweeyaaye*
*Cadceed subax la moodyeey, middaan caashaqaad tahay*
*Goortaan codkaagaa maqlaan, arag u cawdaaye*
*Caadil baan ka tuugaa indhahoo caadka laga qaado*
*Cuddooney tallaabada markaad, aayar celineysid*
*Cududdiyo habbooney markaad, cagaha qaadaysid*
*Xuuralcayntii aakhiro ayaan, kugu ciseeyaayee*
*Carrigaan ku noolniyo ilaa, cidhifka Nayroobi*
*Waxa inan caddaan iyo madaw, Caadil ku abuuray*
*Cindigayga maan gelin mid kale, waad ka ciil bixiye*
*Ogobeey naf kuu ciirsatoo, caajistaan ahaye!"*

Markii uu intaa maqashiiyay ee ay isla ilmeeyeen ayaa ay is nabadgalyeeyeen. Gurigii oo qadadii mar hore la laastay ayuu ku soo noqday, halkaasna ku cunto beelay. Caashaqu sow ma aha ka qofka inta uu jirjirrada ka galo wax walba seejiya? Hees baa ahayd:

*"Jacayl waa dhibaatoo,*
*Waa ka dhiigga kaa jaqa,*
*Kuuna diida dheeftee,*
*Hawlahan ku dhaawacay,*
*Hawlahan ku dhegatirey,*
*Hawlahan wax kuu dhimey,*
*Ha dhibine naftaada dhaqaalee,*
*Ha dhoweysan caashaqa..."*

Layli halkii ay u socotay ayey nabad ku gaadhay, isagu se in ay nabadtagtay iyo in kale war uma hayo, balse niyaddiisa waxa uu ka dhaadhiciyey in ay nabadqab iyo naruuro ku sugan tahay. Muddo laba bilood ah markii ay sii maqnayd ayey maalin soo wacday, waxa ay u sheegtay in ay weli qabqabyo ku sugan tahay oo aanay saldhigan. Soo xidhiidhin la'aanteeda waxa ay ku macnaysay in aanay tilifoon u gaar ah oo ay kala soo xidhiidho qaadan. Maxamed wax uu sameeyo oo kale ma yaqaan oo aan ka hayn in uu aqbalo cudur kasta oo xaggeeda ka yimaadda, xidhiidhkeeda gaabiska ahna uu isaga dulqaato.

Waxa aad mooddaa wixii uu ka baqanayey in uu toos ah u daalacanayo. Sida ay khubarada jacaylku aaminsan tahay, iska warhaynta joogtada ahi waxa ay bishaa jacaylka dhex yaalla laba qof.

In muddo ah waa kii aan tilifoon ka helin. Wuxuu sugaba, habeenkii dambe ayuu ku riyooday shimbir dul taagan oo ku leh *'iska warran?'* Isna wuxuu is yidhi *'waar shimbirkanba maad inanta dhambaalka ugu dhiibtid illeen isaga ayaa dhul fog isaga gooshee"*,

Waxaanu u dhiibay warqaddii isaga oo sii tabantaabiyey. Markii uu u tilmaamayey sifaha inanta iyo farriinta uu tebinayaa caynka ay tahayna, waa kii lahaa:

*"Middii dhiigga miirtee qalbiga, iga dhex maaxaysay*
*Dhaawaca middii aawadeed, dhuuxu iga daatay*
*Dhaydiyo middaan aawadeed, dhuuniga u diiday*
*Goortaan u dhuubtoo cuntadu, ii dhadhami wayday*
*Iga dhooftay inantii wadnaha igaga dheehnayde*
*Adigaa dhul dheer tegi karayiyo meel aan loo dhixine*
*Daruuraha adaa dhaafa oo miig ka orod dheere*
*Adigaan dhaqsaba kaa rejayn, dhaymo daawo lehe*
*Shimbiryahaw dhambaalkayga qaad dhaygag bay dilaye*
*Afrikada tan dhaw maaha iyo Yurub dhankeediiyee*
*Dhabbihii New York ayaad baalka sii dhigane*
*Sawirkeedii Dhool waa codkoon kuu dhammeystiro e*

*Dhoombir naaxday lama doonto iyo dhererka qaarkiise*
*Dhumucda iyo jidhkeeda waad, dhididi doontaaye*
*Waagoo dhalaaliyo cadceed, dhalatay weeyaane*
*Dhabannadoo hillaaciyo afkoo, dhuxulo meygaaga*
*Dhexdoo madaga timahoo dhegtiyo, dhaafay dhabarkeeda*
*Suniyaha sidii loogu dhigay, waygu dheer tahaye*
*Dhan loo dayaba Laylaa ka dhigan, Dheemman iyo Luule*
*Haddaan dhagarta gaaladu beddelin, dhawrsan waad heliye*
*Dhaayuhu markay kuu qabtaan, dhiirri hadalkaaga*
*Dhunkashada salaantiyo markaad, booqashada dhiibto*
*Waxaad odhan dhambaalkaan wadaa, dhaxalgal weeyaane*
*Bal dhegayso Laylaay warkaan, kuu dhammaystiriye*
*Dhegahana u furo hadalku waa, mid aan la dhaadayne*
*Nin baa dharaarahan cishqigu, awaadaa dhibay dheh*
*Nin baa u dhaw oo qabriga, dhinac ka saarnaa dheh*
*Dhawr beri nin baan aawadaa, dhuunigii cunin dheh*
*Dhab markuu u seexdaa hurdada, laga dhirbaaxaa dheh*
*Naftii dhimasho laga baajiyaa, ma aha dheel dheel dheh*
*Dhaqtarradu ma daawayn karaan, ruux jacayl dhibay dheh*
*Maxaan Maxamed ugu dheefceshaa, dhaygag baa diliye dheh*
*Shimbirkii markii uu farriintii geeyey ee uu Layla u*

*dhiibay ayuu soo noqday isaga oo leh:*

*"Maxamadaw dhambaalkiyo warkaad aniga ii dhiibtay*
*Markaan dhuuxay maansada qalbigu dheelli laba jeere*
*Dhafoorrada adoo haysta oo dhaygag ledi waayey*
*Waa taan dhaqaaqoo hawada, dhiibshay baallaha e*
*Dhalandhoolka awgaa u tagay dhulaan la gaadheyne*
*Dhabbihii New York markaan dhab ugu laafyooday*
*Dhinacyada markaan eegayeen uunka wada dheehday*
*Midda dhiiga miirtay indhuhu dhab u jalleeceenee*
*Waa dhool guyoo hooray iyo dhibic daruureedee*
*Weli dhaqankii gaalada ma baran dhabanwanaagley e*
*Dhaayaha intaan saaray dumar waw dheg roon tahaye;*
*Dhunkashada salaantiyo markaan booqashadi dhiibay*
*Iyadoo sideedii u dhigan xarafna ii dhuuman*
*Dhab ku siiyey sheekada qof xuni kuuma dhiidhiyo e*
*Dhayal hadalkii uma qaadan iyo weliba dheeldheele*
*Waxay tidhi 'dhambaalkaad waddaa, waa mid igu dheere*
*Dhuuxiyo laftuu iga galoo dhaawac igu reebye*
*Haddii aanan dhiman oo xabaal dhinaca lay saarin*
*Dhoobada haddaan laygu ridin Maxamed hay dhawro!"*

Dadkii inta uu ka dhex baxay ayaa uu noqday sidii qof uu xanuun hayo, jidhkiisii ayaa gurmay, markaas buu isu beddelay qof caataysan. Islaan ay jaar ahaayeen

ayaa ku tidhaahda: "Maxamed, ma caynbacayn baa ku haya?" Caynbacaynku waa cudur carruurta ku dhaca oo toddobaadna ka dhiga qof dhuuban todobaadka kalena naaxiya.

Jacaylku caato iyo cudurba dadka uu haleelo in uu ku rido waxa loo hayaa daliil cad; abwaannadda iyo suugaanyahannada Soomaalidu aad bay uga hadleen oo ugu nuuxnuuxsadeen. Abwaan Cilmi-Boodhari, oo dadku u yaqaannaan Aabbaha Jacaylka, ayaa dhowr jeer ku cataabay sida uu caashaqu laf iyo jiidhba inta uu isaga baxay u caateeyay:

*"Cudduduhu ma naaxaan qofkay talo ku ciirtaaye*
*Casharkay wadaaddadu qoreen cudurkan goyn waaye*
*Cilmi iyo dawaba doontay oo waayey cilinkiiye*
*Jeeroonse canabeey ku helo caafimaad dhimaye*
*Inaan caad noqdaa baa ka roon caawa saan ahaye*
*Illayn caashaq lama maydhi karo kugu cirrooloobay!"*

Maxamed waxa la soo deristay duruuf adag oo sida looga baxaa ay adag tahay, jacaylkii oo cartamay ayuu qool u galay.

Dagaalladii baa soo kululaaday, waddankii waxa uu galay kalaguur. Tilifoonkeedii ayaa go'ay. Warkii uu xaggeeda ka heli jiray ayaa, gebi ahaanba, istaagay.

Xubbigii uu muddada soo waday ayaa dheelliyay. Waxa uu is waydiiyey 'dareenkani malaha adigu uun baa uu gooni kugu yahay ee gabadhani kulama ay qabin?' Wadasocoshada meesha ka kaxday iyo sida ay uga gaabsatay ayaa werwer ku abuuray; dhibta iyo xanuunka daran ee uu deriska la noqday iyo sida ay uga war la'dahay, ayaa isu qaban waayey. Hees ayaa ahayd:

*"Xiska weerar gelisaye*
*Waxa nool adduunyada*
*Adaan kugu werweryaa*
*Warna iima hayside*
*Wehelkii naftaydaay Weedhaad tidhaahdaa Wadnahay ku taallaa,*
*Warna iima hayside..."*

Maxamed, oo gabayada qisadiisa ku saabsani sida togagga ugu soo rogmanayaan, ayaa mar kale la soo mirkacay tix uu dumarka wax kaga tabanayo. Maxaa ka jira in dumarku inta ay jacaylka kula unkaan oo kula ababiyaan marka uu uu qaangaadho ee xilligii la guran lahaa uu taagan yahay ay kaaga baxaan? Waxa uu ku andacooday in jacaylkii lala abuuray looga hoos baxay. Gabaygiisa ayaa uu ku sheegay in arrintaas dumarku ka siman yihiin, haddana inta uu giraanta isku soo weeciyo ayuu naftiisa khaladka saaraya isaga oo kuu eedayanaya

in iyadu dhibta u horseedday. Waxa kale oo uu maansada ku xusayaa in bahalku yahay aafo aan loo maaro helin, kiniin iyo dawo lagaga caafimaadaana aanay jirin, sida ay u muuqatana uu nafluhu la godgalayo. Waxa uu yidhi:

*"Waa aqoonta dumar*
*Inay kula unkaan*
*Kula ababiyaan*
*Jacayl kula abyaan;*
*Eridhaban sidii*
*Kula ooyayaan*
*Kaa tiraan ilmada*
*'Aamus' kugu dhahaan*
*Markaad aamintana*
*Abataqa inay*
*Kugu aabbudhaan*
*Waa lagu og yee;*
*Maahee iyada*
*Waxaan eersadaa*
*Lugihii ordee*
*I ag geeyay iyo*
*Afkaan kula hadlee*
*Erayada macaan*
*'Abbaayooy' ku idhi;*

*Maahee iyada*
*Waxaan eersadaa*
*Unugyadii jidhkiyo*
*Uurkiyo wadnii*
*Igu yidhi 'addeec!'*
*Aheey waa aheey*
*Adduunyada markuu*
*Rabbi uumay ee*
*Ummo Xaawa iyo*
*Aadan lagu alkumay*
*Ilaa maalintaa*
*Aafada kalgacal*
*Kiniin loo igmiyo*
*Irbad looma helin*
*Inta uu nafluhu*
*Ka idlaanayana*
*Mid adkaysta iyo*
*Mid uu iil ku rido*
*Dadku aramidiyo*
*Ukuntiisa way*
*La abaadayaan;*
*Imisaa arliga*
*Laba uguba oo*
*Isu uurnuglaa*

*Wakhti kala eryoo*
*Iyagoon is helin*
*Urugiyo xusuus*
*Meel kula ambaday;*
*Aheey waa aheey*
*Anna aynigaa*
*kama ood fogiye*
*Anfariir miyaa*
*Aqal ila hurdoo*
*Amakaag miyaan*
*Ehel moodayoo*
*Axdi dumar miyaan*
*U ilmaynayaa!"*

Waagii dambe waxa uu niyaddiisa geliyay in jacaylku yahay ka baaqiga noqonaya. Filim la odhan jiray "Dadku waa ay dhintaan laakiin jacaylku ma dhinto" mar uu daawaday ayaa uu xusuus galay, markaas baa maansadani curatay:

*Adduunyada dharaartii*
*Dhismaheeda udubkiyo*
*Loo dhaabay xididdada*
*Aadan oo dhammaysaa*
*Dhoobo laga abuuroo*

*Keli laguma dhaafine*
*Waa tii dhinaca feedhaha*
*Xaawa laga dhambalayoo*
*Dhab baa la isu weheshaday*
*Dabadeed dhexdoodii*
*Dheddig iyo labood*
*Rabbigay ka dhaliyoo*
*Dheeh la isu mariyoo*
*Guur loo dhawaaqiyo*
*Dhaqan bay ka beermeen*
*Muxibbadu u dheer tahay*
*Ifku wayska dhalanteed*
*Iyo meel habeendhaxa*
*Oo laga dhaqaaqee*
*Midba dheefti loo qoray*
*Markii uu dhammaystaa*
*Dhabankiisa ciiddiyo*
*Iilka loo dhudhumiyaa*
*Dhagax lagu dul awdaa*
*Kagacaylka dhumucdiyo*
*Dhererkiyo laxaadka leh*
*Ma dhintoo xanuun iyo*
*Dhibi kuma timaaddoo*
*Ma dhadhamiyo geerida*

*Inta aan dhidibka samadiyo*
*Xiddigaha dhalaaliyo*
*Cirka aan la kala dhigin*
*Dhulku uu sidaa yahay*
*Weligii ma dheelliyo*
*Dhacdo weeye aan hadhin*
*Iyo dhaxal maguure ah*
*Dadkuun baa dhammaadee*
*Dhegaanugule caashaqu*
*Dhaaxuu dambeeyaa*
*Haddba dhawrka soo kaca*
*Dhirbaaxada la eegtaa*
*Cimrigiisu dheeraa*
*Anna waxaan ka dhuuntaba*
*Iga dhawrsan waayoo*
*Hadduu dhuumihiisii*
*Ii saaray dhabarkoo*
*Addimadu dhaqaaqii*
*Dhutiyee tallaabada*
*Dhiirran waaye socodkii*
*Siddii neef dhunkaal qaba*
*Waan dhogor xumaadee*
*Dhirta waan ka waashoo*
*Dhalandhoolay milicdoo*


*Dhakafaar haddeeraan*
*Dhabannada la haystaa*
*Dhaameelka Hawdiyo*
*Dhebi baxay la mooddii*
*Ma hadday dhankeedii*
*Ka dhantaashay caashaqa*
*Oo aan dhunkaal iyo*
*U dhadhamay siddii dacar*
*Anigaa is dhiiboo*
*Dhalanteed ka raacaye*
*Dhoohane jacaylkow*
*Dhawacaad i yeeshaa*
*Igu dhaliyay nabarkoo*
*Dhibka ii horseedaye*
*Adaa dhiig la miiriyo*
*Dheecaanka aadmiga*
*Sida dhayda caanaha*
*Weligaa dhamaayaye*
*Anna dhuuxa igu jira*
*Dhuuq xididdadaydoo*
*Dhaqdhaq ha igu reebine*
*Dhereg waad i qabatee!"*

Whakhti badan mar ay ka soo wareegtay ayaa isaga oo Kiiniya jooga uu war ka helay. Wixii markaa ka dambeeyay war iyo wacaal kama helin. Maansadan kale ayaa uu curiyay mar dambe:

*"Inanyahay daruurtiyo*
*Dayaxoo iftiimiyo*
*Sida dirirka cawleed*
*Dadka raalligelisoo*
*Diirkiyo jidhkeediyo*
*Dusha xaaddu ka iftoo*
*Hooyadeedii dihatiyo*
*U duceeyay aabbuhu*
*Ma og tahay daraaddaa*
*In aan kuu dullooboo*
*Dakharradii jacaylkiyo*
*Dooguhu i gaadheen*
*Damqanaayo awgaa,*
*Naftan kuu dullowdoo*
*Dalanbaabbinaysoo*
*Daaraha la seexdiyo*
*Diidayso gurigoo*
*Dibadaha u hoyatoo*
*Inta Daayin uumiyo*

*Dumar adiga kuu jecel*
*Sow ima daryeeshidoo*
*Ma dugsidid walaaleey*
*Mise dahab la moodyeey*
*Anaa daalay mooyee*
*Doc kalaad la haysaa*
*Taariikh da' wayn baa*
*Dibindaabyadeennii*
*Laga daalacdaayoo*
*Raggu wuxuu dareemaa*
*Ama dib u xasuustaa*
*Cilmi digashadiisiyo*
*Darbiyada xanuunkuu*
*Hodan ugu dan sheegtiyo*
*Sidii loogu daawaday*
*Anna doqon jacayl baa*
*Dabar iigu kaa xidhay*
*Dookhiyo kalgacalkaa*
*Igu kaa dirqinayee*
*Dawooy kuma idhaahdeen".*

# WEHEL Jacayl



Buuggan waxa uu qofku kaga bogan doonaa dhammaan jawaabaha uu tebayo iyo su'aalaha jacaylka ah ee uu u taag waayo. Sidoo kale "Wehel Jacayl" waxa uu diiradda saari doonaa ifafaalaha qurxoon ee jacaylku leeyahay iyo aafooyinka laga dhaxlo marka la dhayalsado.

Jacaylku maadaama uu yahay udubdhexaadka nolosha, hagaajinta iyo hirgelinta qoysaska Islaamkana uu ka qaato kaalin mug wayn, waxa aan wakhtigayga inta u badan ku qaatay in aan daraaseeyo oo aan daba galo si maxsuul la mahadiyaa uu iigu soo baxo. Maqaallada aan ka qoray marka laga yimaaddo, buuggii ugu horreeyay ee aan ku uruuriyaa waxa uu noqday "Hadyad Jacayl" kaas oo wada gaadhay geyiga Soomaalida. Geeddigii labaad waxa aan ku furay buugga "Wehel Jacayl" oo aan hubo in uu idinka haqabtiri doono dhambaalka uu xambaarsan yahay.

*Cabdisamad Awdahir Ismacil "Sumcadda"*

Hiil Press
ISBN: 978-1-63944-119-8
contact@hiilpress.com
@MadbacaddaHiil
9 781639 441198
Time Media
+252634000135 Somaliland
Time.media@laas-group.com